

---

*Taxanaha Buugaagta IMS -  
Difaaca saxaafadda*

---

# Badbaadada Saxafiyiinta Haweenka: Rabshad, Aamusnaan iyo halista sinnaanta

---

*Guudmar guud oo ku saabsan sagaal dal*

---



paving the way for good journalism

*IMS Taxanaha Buugaagta Difaaca Säxaafadda  
Waxaa lagu daabacay Denmark.*

Daabacaha: International Media Support (IMS)

ISBN: 978-87-92209-73-3

EAN 9788792209733

**IMS**

Nørregade 18  
1165 Copenhagen K  
Denmark  
+45 88327000  
[info@mediasupport.org](mailto:info@mediasupport.org)

**© 2019 IMS**

Waxyabaha ay ka kooban yihii daabacaadahan waxay yihii  
kuwo xafidan. International Media Support i (IMS) waxay ku  
faraxsan tahay inay idin la wadaagto qoraalka kaasoo hoos  
imanaya hal abuurka caalamiga ah ee 'Creative Commons  
Attribution-ShareAlike 4.0.

Si aad haddaba u aragto soo koobitaanka shatigan ama  
ruqsaddan, fadlan booqo  
<http://creativecommons.org/licenses/by-sa/4.0>.



*Ku soo biir hawsha caalamiga ah ee xorriyadda hadalka, lana  
soco xaaladaha ku saabsan arrimaha warbaahinta dunida.*

Warbaahin xor ah darteed  
 InternationalMediaSupport

International Media Support (IMS) waa hay'ad aan  
macaashdoon ahayn oo ka shaqeysa taageeridda warbaahinta  
maxalliga ah ee waddammada ay ka jiraan iskahorimaadyada  
ama shaqaaooyinka iyo kala-guurka siyaasadeed oo  
adkeynaya in saxaafadda ay ka shaqeyso.

[www.mediasupport.org](http://www.mediasupport.org)

Qore: Silvia Chocarro  
Tifatiraha: Robert Shaw  
Qaabka: Nanette Vabø

*(Tusmada)*

- 4      *Liiska soo gaabinada iyo macnahooda*
- 5      *Mahadnaq*
- 6      *Hordhac: Muuqaal Guud*
- 9      *Koobitaan fulineed*

*QAYBTA KOOWAAD*

- 14     *Saxafiyiinta haweenka: Wajahidda halis labajibaaran*
- 18     *Ma waxaa ka go'an ururrada caalamiga ah badbaadada haweenka saxafiyiinta ah?*
- 21     *Bulshada rayidka ah ee caalamiga ah waxay ka shaqeessaa sidii kor loogu qaadi lahaa amniga saxafiyiinta haweenka*
- 24     *Udhawaanshaha badbaadada saxafiyiinta qaab jinsi-xasaasi*

*QAYBTA LABAAD*

- 26     *Sawir guud oo caalami ah: Hanjabaadyo gaar ah ee Jinsiga, caqabadaha & jawaaba-ha kajira sagaal waddan*
- 26     *Afgaanistaan: Markay rabshaduhu ka bilaabmaan guriga*
- 29     *Kolombiya: Ka guurista ilaalinta ilaa ka-hortagga*
- 32     *Indonesiya: Wax ka qabashada Kadeedka galmada*
- 33     *Ciraaq: Ciraaq: Sameynta wax aan la arki karin, muuqdana*
- 34     *Kenya: Kor u qaadista wacyiga*
- 36     *Neebaal: Sinnaan la'aanta goobta shaqada*
- 38     *Bakistaan: Joojinta aamusnaanta*
- 43     *Soomaaliya: Horumarinta sinnaanta jinsiga xagga warbaahinta*
- 45     *Filibbiin: Curinfikrado cusub ee nabadgeelyada*

*QAYBTA SADDEXAAD*

- 48     *Eegista Mustaqbalka: Awdidda farqiga u dhexeeya jinsiga*
- 52     *Tabarruceyaal*
- 54     *Ilaha dhaqaale iyo buugaagta*

# Liiska Soogaabinada Iyo Macnahooada

ACHPR	African Commission for Human and People's Rights	JSAG	Journalists Safety Advisory Group
ACOS Alliance	A Culture of Safety Alliance	KMWG	Kenya Media Working Group
AIJC	Asian Institute for Journalism and Communication	LGBTQI	Lesbian Gay Bisexual Transgender Queer Intersex
AJF	Afghan Journalists' Federation	MAP	Media Association of Puntland
AJI	Aliansi Jurnalis Independen	MCK	Media Council of Kenya
AJSC	Afghan Journalists' Safety Committee	MoWA	Ministry of Women's Affairs
AMWIK	Association of Media Women in Kenya	NHRC	National Human Rights Commission
APC	Association for Progressive Communication	NPC	National Press Council
CCJD	Center for Community Journalism and Development	NPU	Nepal Press Union
CEDAW	Convention for Elimination of all forms of Discrimination Against Women	NUJP	National Union of Journalists of the Philippines
CERRUM	Committee for Risk Evaluation and Measure Recommendations	OAS	Organization of American States
CMFR	Center for Media Freedom & Responsibility	OHCHR	Office of the United Nations High Commissioner for Human Rights
CoE	Council of Europe	OSCE	Organization for Security and Co-operation in Europe
CPAWJ	Centre for the Protection of Afghan Women Journalists	PJSF	Pakistan Journalism Safety Fund
CPJ	Committee to Protect Journalists	PCIJ	Philippine Center for Investigative Journalism
DRF	Digital Rights Foundation	PCW	Philippine Commission on Women
FATA	Federally Administered Tribal Areas	PPI	Philippine Press Institute
FESOJ	Federation of Somali Journalists	PSSC	Philippine Social Science Council
FLIP	Fundación para la Libertad de Prensa	PTFoMS	Presidential Task Force on Media Security
FNJ	Federation of Nepali Journalists	RSF	Reporters without Borders
FPU	Free Press Unlimited	SAMSN	South Asia Media Solidarity Network
GMMP	Global Media Monitoring Project	SAS	Sancharika Samuha
HRC	Human Rights Council	SDG	Sustainable Development Goals
IAWRT	International Association of Women in Radio and Television	SMSG	Somalia Media Support Group
IFJ	International Federation of Journalists	SOWRJA	Somali Women Journalist Rights Association
IJRDA	Iraqi Journalists' Rights Defense Association	SWJ	Somali Women Journalists Organisation
IMS	International Media Support	UN	United Nations
INSI	International News Safety Institute	UNDP	United Nations Development Programme
IPI	the International Press Institute	UNESCO	United National Education Science and Culture Organisation
IREX SAFE		UNGA	United Nations General Assembly
IWJF	Iraqi Women Journalists Forum	UNP	National Protection Unit
IWMF	International Women's Media Foundation	UNSC	United Nations Security Council
JCSSJ	Joint Committee for the Safety and Security of Journalists	WAN-IFRA	World Association of Newspapers
		WWJ	Working Women Journalists

# Mahadnaq

Worbixintaan waxaa soo aruuirisay oo qortay Silvia Chocarro, oo ah khabiirad horseed u ah xorriyadda hadalka iyo arrimaha horumarinta warbaahinta iyadoo ku mataleysa International Media Support (IMS). Lataliyaha IMS Robert Shaw wuxuu ahaa tifatiraha guud; Elisabeth Witchelna, lataliyi xagga xorriyadda hadalka iyo Helle Wahlberg oo ahayd madaxa isgaarsiinta IMS, oo u shaqeysay sida tifaftire.

Intertanational Media Support (IMS) waxay u mahadcelineysaa shaqsyaadka soo socda oo ku soo biiriay waqtigooda, cilmi baaris iyo khibrado ku aaddan warbixintan: Abraham Agamata, Mona Ansari, Owais Aslam, Red Batario, Binod Bhattari, Jonathan Bock, Victor Bwire, Lydia Gachungi, Julian David García, Myra Imran, Susanna Inkinen, Manja Kamwi, Iqbal Khattak, Endah Lismartini, Johana Moreno, Malin Palm, Jeraldine Pascual, Adnan Rehmat, Amika Rajthala, Therese San Diego, Dhikra Sarsam and Amalia Toledo.

# Hordhac: Muuqaal caalami ah

Tobankii sano ee la soo dhaafay, waxaa kordhay wacyigelinta iyo ka warqabka in haweenka warbaahinta lagu hayo weerar ku saleysan jinsi, oo ay weheliso faham ballaaran oo ah in tani ay caqabad weyn ku tahay xorriyadda saxaafadda iyo horumarka. Sannadkii 2012, Qorshaha Waxqabadka ee Qaramada Midoobay ee Badbaadada Saxafiyiinta iyo ciqaab la `aanta ayaa la meel mariyey, kaas oo ku baaqaya qaab ku saleysan jinsi. Tani waxay dhalisay baahi sii kordheysa oo ku saabsan dadaallo wax looga qabanayo baahiyaha amniga ee saxafiyiinta haweenka ah. Laakiin tani micnaheedu muxuxuu dhab ahaantii ka dhigan yahay? Dukumintigaan ayaa wuxuu bilaabayaa inuu ka hadlo su'aashan.

Markii ay haween badan ka hadleen arinta, waxaa cadaatay in halis badan ay jirto oo ay haweenku ku sugar yihiin. Ma aha oo keliya rabshadaha, waxaase kaloo jira oo ka mid ah, inta badan qaab weerar faraxumeyn ah, iyo dhaqanno dababheeraaday oo si daran uga hor yimid awoodda haweenka inay ku sii dhaqmaan oo horay ugu sii wadaan mihnadda. Kuwaani waxay qaataan qaabab badan: galmo kadeed ah, xaalado shaqo oo aan sinnayn iyo xad gudub toos ah oo xad dhaaf ah. Dhaqanka ku soo badanaya qolalka war-diyaarinta ayaa noqon kara mid laga takhaluso ama xitaa cadaawad u ah haweenka ama si sahlanna uma diyaarsana marka laga hadlayo wax ka qabashada welwelka gaarka ah ee la xiriira jinsiga. Saxafiyiinta haweenka ah ee dalal badan waxay sidoo kale la kulmaan culeysyo bulsho iyo qoys oo aad u badan, kuwaas oo carqaladeyn kara ama niyadjab ku ridi kara shaqadooda. Markii haweenka saxafiyiinta ah laga xayiro ama lagu soo koobo shaqada, bulshada kama heli karaan macluumaad iyo aragtiyo kala duwan.

Hay'adda Caalamiga ah ee Taageerada Warbaahinta (Intertanational Media Support -IMS) ayaa qortay warbixintan si ay u sii qiimeyso arrinta sida haweenka loola beegsado warbaahinta iyo sida saxaafadda ay u saameyneyo isku dhibaateyn ta galmada iyo rabshadaha. Toddobo sano kadib markii la bilaabay Qorshe Hawleedka Qarmada Midoobay, waxay sidoo kale baaraysaa ilaa xadka dhibaatadan si wax ku ool ah looga hadlay heer qaran oo ay taageerto bulshada caalamka.

Worbixinta waxaa loo diyaariyey iyada oo qayb ka ah dadaalka dheer ee IMS iyo barnaamij-hawleedkii lagu hormarinayay dariiqa dhameystiran oo loo maro badbaadada susufiyiinta. Iyada oo lala kaashanayo lahawlgalyaasha kale ee qaranka iyo kuwa caalamiga ah, IMS waxay raadisay inay horumariso oo ay xoojiso barnaamijyada loogu talagalay ka hortagga iyo ka jawaab celinta halista ka dhanka ah saxafiyiinta iyadoo la horumarinaayo habab maxallii ah oo la siinayo susufiyiinta ilaalintooda, oo ay ku jirto nabadjelyo gaar ah iyo talaabooyin ilaalil ah oo loogu talagalay shaqaalaha dumarka ah ee warbaahinta iyo sidoo kale difaacaya ciqaab la'aanta (Impunity) iyo xaqqa saxafiyiinta u leeyihiin gudashada waajibaadkooda. Ujeeddooyinka IMS ee shaqadan waxaa ka mid ah in si firfircoo loo taageero hirgelinta Qorshaha Qaramada Midoobay ee Tallaabada Badbaadinta Saxafiyiinta iyo su'aasha la-xisaabtan la'aanta.

Dhisidda faham guud oo ku saabsan hanjabaadaha saxafiyiinta iyo wadaagista dhaqamada wanaagsan ayaa ah tillaaboojin muhiim u ah wanaajinta jawaabaha iyo isu-duwidda iyo abaabulidda daneeyayaasha inay wax badan qabtaan. Iyadoo tan

maskaxda lagu hayo, IMS waxay daabacday daraasad caalami ah sanadkii 2017; "Difaaca saxaafadda: Sidee farsamooyinka qaranku u difaaci karaan suxufiyiinta una xallin karaan dhibaatada la xisaabtanka ". Daabacaaddu waxay falanqaysay dadaallada socda ee wax looga qabanayo badbaadada suxufiyiinta ee ku sugaran toddobo waddan oo ay ka jiraan iskahorimaadyo, xasillooni darro iyo rabshado aan la xakameyn karin oo ka dhan ah saxaafadda oo caqabad ku ah amniga suxufiyiinta, iyagoo caqabad ku ah awooddooda soo-sarista suxufiyiin tayo leh. Iyada oo ku saleysan daabacaadda 2017, IMS ayaa u xilsaartay la-taliye Silvia Chocarro in ay soo aruuuriso warbixintan iyada oo diiradda lagu saarayo dhinacyada jinsiga amniga.

Qeypta 1aad ee warbixinta, Chocaro waxay bixisay aragti guud oo caalami ah oo ku saabsan nooca halista haweenka saxafiyiinta ah ay wajahaan, iyadoo xustay in la bartilmameedsado suxufiyiin ahaan iyo mar labaad iney yihiin dumar. Waxay sidoo kale baaraysaa talaabooyinka ay qaadaan ururada caalamiga ah, oo ay ku jiraan ururrada aan dawliga ahayn, Qaramada Midoobay iyo hay'adaha gobolka. In kasta oo saldhig caadi ah laga sameeyay iyada oo loo marayo dukumiintiyo badan oo caalami ah oo aqoonsan baahida loo qabo in la helo qaab ku saleysan jinsi, tiro hay'ado ah ayaa bilaabay inay sameeyaan baaritaan muhiim ah oo ku saabsan arrintan iyo sidoo kale qaar ka mid ah barnaamijyo la taaban karo oo wax looga qabanayo dhibaatooyinka ay ka mid yihiin kadeedka khadka tooska ah, tababbarka loogu talagalay amniga, iyo baahiyo badan. Waxa loo baahan yahay in la sameeyo wax badan si loo arko walaacyada jinsi ee ka jira dhammaan howlaha badbaadada ee daneeyayaasha.

Qaypta 2aad ee warbixinta ayaa eegeysa xaaladda sagaal waddan sida: Afgaanistaan, Kolombiya, Indoneysi, Ciraaq, Kenya, Nebaal, Bakistaan, Filibbiin iyo Soomaaliya - toddobo kamid ah waddamadaas waxaa lagu soo bandhigay daabacaada 2017. Wadamadaas waxaa loo xushay inay isu keenaan khibradaha waddamo kala duwan, deegaanno kala geddisan oo la ogyahay inay khatar ku yihiin suxufiyiinta. Iyadoo laga shidaal qaadanaayo falanqaynta horudhaca ah, warbixintu waxay cadeyneysaa aagagga shaqada ee muhiimka ah in xoogga la saaro sidii hore loogu sii socon lahaa Qeypta 3aad.

Dukumintigaani wuxuu diiradda saarayaa suxufiyiinta, wuxuuna adeegsanayaa ereyo ay ka mid yihiin "nooc ah 'si loogu tixraaco astaamaha la dhisay oo xiriir la leh lab ama dhaddig, oo ay ku jiraan kaalimaha, mas'uuliyadaha, fursadaha, baahiyyaha iyo caqabadaha loo adeegsado in lagu caddeeyo farqiga u dhhexeeyaa iyo xiriirka awoodda. Kuma jiraan falanqayn gaar ah ama xog ku saabsan doorsoomayaasha kale ee dheddigga ah sida aqoonsiga iyo galmaada, ama sida kuwan ay iskudhaafka u yihiin doorsoomayaal kale sida qowmiyadda, dhaqanka, da'da ama heerka bulshada. Baaritaanka lagu sameeyay dokumentigan wuxuu daaha ka qaadayaa in heerarka caalamiga ah iyo kuwa goboleedku ay tixraacaan haweenka marka ay codsadaan qaab galmo oo la xiriirta amniga suxufiga. Hay'adaha iyo hay'adaha kale ee ilaaliya shaqaalaha warbaahinta sidoo kale waxay u muuqdaan inay wax ka qabtaan xaaladda suxufiyiinta haweenka marka ay ku daraan qaab jinsi barnaamijyadooda.

Nuxurka warbixinta waxaa badanaa laga soo qaatac cilmi-baarlis dokumentiyo ah oo ay taageerayaan la tashiyo aan rasmi ahayn oo lala yeeshay tiro khubaro maxalli ah. Xaaladaha qaarkood, macluumaadka waxaa laga soo qaatac wadashiyiyo, kooxda xallinta iyo cilmi baaris ay IMS ka sameysay waddamo kale ama la-hawlgalayasheeda marka loo eego barnaamijyadeeda amniga. Mashaariicda iyo baaxadda kiisaska daraasadaha waxaa loogu talagalay inay noqdaan kuwo sharax leh intii ay dhammaystiri lahaayeen. Sida

dukumenti shaqeynaya, warbixinta ayaa looga golleeyahay in lagu bixiyo tusaale gogolxaar u ah wadahadalada socda iyo horumarinta xalka, halkii ay ka ahaan laheyd falanqeyndhameystiran.

Mashaariicda iyo baaxadda kiisaska daraasadaha waxaa loogu talagalay inay noqdaan kuwo tusaale muujinaya oo fasiraad leh halkii ay noqon lahaayeen kuwo dhameystiran. Sida dokumenti shaqeynaya, warbixinta waxaa looga gol leeyahay iney gogol xaar u noqoto wadahadalka socda iyo dhisidda xallinta halkii laga sameyn lahaa falanqayn dhammaystiran. Sida lagu qeexay warbixinta gaarka ah ee Qaramada Midoobay, Soo koobid ama dil aan sabab lahayn, Agnes Callamard, warbixinteeda 2017 ee ku saabsan qaab Jinsi-dareen (gender-sensitive) dilalka aan sababa lahayn.

Jinsi-dareen waa hab horumar leh, waana in la bartaa sidii loo sameyn lahaa. Ku celceli si aad u ogaato cilladahaaga, dib u eeg khaladdaadkaaggi, fadlan isku day mar kale. Waxay weli sii wadysaa isbeddelo, waxayna u baahan tahay caqli dheeri ah oo si fiican loo lafuray, hab iyo hannaan ballaaran. Waxay u baahan tahay furfurnaan maskaxeed, ujeeddo cad, iyo aqoonsi taasoo dhici karta in kuwa kale ay xoojiyaan habkaas bilo dhedhood amaba sanadaha soo socdal”.

# Koobitaan Fulineed

Waxaa jira faham caalami ah oo sii kordhaya oo ah in saxafiyiinta haweenka ay la kulmaan hanjabaadyo gaar ah oo ku aaddan nabadgelyadooda iyo horumarintooda xirfadeed iyo in isku-darka qaab u qalma jinsi ay lama horaan u tahay kor u qaadista amniqa suxufiyiinta adduunka iyo in la hubiyo inuu jiro kala duwanaansho, maaha oo keliya farqiga u dhhexeeya dadka ka hawlgala warbaahinta laakiin wuxuu ku dhex jiraa ee uu ka muuqdaa dhammaan qaybaha bulshada.

Tiro ka mid ah dukumiintiyada Qramada Midoobay (UN) ayaa muujinaya tan, laga bilaabo Qorshe howleedka Qaramada Midoobay ee 2012 ee Nabdoonaanta Saxafiyiinta iyo arrinta la xisaabtanka, waxaa ku xiga qaraarrada Golaha Xuquuqul Insaanka, Golaha Guud ee Qaramada Midoobay iyo Golaha Aminiga iyo bayaannada, tilmaamaha iyo bayaannada ka soo baxay shirarka gobolka. Baadhitaanno kala duwan ayaa laga soo saaray xorriyadda kooxaha hadalka, UNESCO, OSCE iyo kuwa kale oo bixinaya sawir cad oo ku saabsan baaxadda iyo nooca weerarrada loo geysto saxafiyiinta haweenka. Dadaallada qaran iyo kuwa caalamiga ah ee daneeyayaasha adduunka - oo ay ku jiraan qaar ka mid ah soddomeeyada ee warbixintan lagu soo xusay - waxay qaadeen tallaabooyin looga hortagayo rabshadaha, kadeedka galimada, iyo caqabadaha kale ee hor-istaagaya horumarka haweenka ee warbaahinta iyo ka hadlidda arrimaha haweenka. Wadahadalka iyo wacyigelinta ayaa waxaa dhaqan u ahaa mid xasaasi ah, oo inta badan lama taabtaan ahaa, dhanka amniqa warbaahinta, iyo sidoo kale dadaallada sii kordhaya iyo isku-duwidda sida wax looga qaban karo, waa tallaabo dhiirrigelin ah laakiin waxay yihiin talaaboooyin hore oo mushkilad ballaaran leh.

IMS waxay soosaartay warbixintan si ay u qiimeysa mowqifkeenna iskudhafka jinsiga iyo badbaadada suxufiga, iyadoo baaraysa tusaalooyinka dhaqamada wanaagsan iyo aqoonsashada meelaha mudhaanta u leh shaqada mustaqbalka.

Waxay eegaysaa qaar ka mid ah shaqada caalamiga ah ee la qabtay si loo sii fahmo ugana jawaabto khataraha loo geysto saxafiyiinta haweenka iyo sidoo kale duruufaha gaarka ah iyo dadaallada ka socda sagaal waddan: Afgaanistan, Kolombiya, Indonesia, Ciraaq, Kenya, Nebaal, Bakistan, Soomaaliya iyo Filippiini. Warbixinta waxaa ku jira cutubka ugu dambeeya dariiqa loo maraayo.

## Caqabadaha waaweyn, kahortagga iyo wax ka qabashada

Iyadoo laga ambaqaadayo cilmi baaris ay sameeyeen kooxo kala duwan oo xorriyadda hadalka ee adduunka, iyo la tashiyo lala yeeshay khubaro gaar ahaaneed, qoraaga warbixinta, Silvia Chocarro waxay ku soo gabagabeyneysaa caalami ahaan, hanjabaadaha haweenka saxafiyiinta ay wajahayaan waa labo-laab. Maaddaama ay yihiin suxufiyiin dhibanayaal u ah halista sida suxufiyiinta kale, waxaase u dheer iyaga in loo bartilmaameedsado iney yihiin oo keliya dumar qaadanaaya kaalinooda oo u shaqeeya bulshada. Dhibaatooyinka welwelka hadda jira sida xabsi weyn, dilaaga, ciqab la'aanta baahsan iyo weerarada ka dhaca goobaha dhijitaalka ah, waxay saameeyaan haweenka saxafiyiinta sida ay u sameeyaan saxafiyiinta ragga ah, laakiin weerarrada loo geysto saxafiyiinta haweenka ah ayaa had iyo jeer noqda qaab khasab ah oo jinsi ah. Kadeedka

galmada iyo sinaan la'aanta jinsiga ee goobta shaqada ayaa ah walaac dheeraad ah oo ay haweenku wajahaan si ay shaqadooda u wariyenimo u qabsadaan.

Saamaynta kadeedka jinsiga, ayay xustay, in haweenku ka tagayaan ama ay doorteen inaysan xaalkas ku sii shaqayn karin oo suxufinnimo, is-xisaabinta iyo dhibaatada nafsiyan iyo jir ahaanba ka soo gaaraysa.

Tani waxay gacan ka geysaneysaa ku filnaanta daboolida codka haweenka iyo rajada laga qabo. Natiijooyinkaas waxaa sii xumeyey taageero la'aanta iyo habmaamuuska qiyaasta ay ka sameeyeen warbaahinta, xirfadlayaasha xorta ah, habka qaran ee gudaha iyo barnaamijyada amniga bulshada rayidka ah. Sidookale, hoos u dhaca weerarrada. Intaa waxaa sii dheer, dumarka oo ka baqaya inay waayaan shaqooyinkooda, iyadoo aanan loo xilsaar inay ka hadlaan arrimo gaar ah oo loo arko inay khatar tahay ama aan ku habooneyn haweenka oo ay ku ceebeeyaan asxaabta, qoyska iyo bulshada guud ahaanba. Warbixinta ayaa tilmaamaysa caqabado dhawr ah oo muhiim ah oo ka soo baxay sagaalka waddan, kuwaas oo intooda badani ay ka dhacaan saddexda qaybood ee soo socda:

- *Amniga jir ahaan:* Saxafiyiinta haweenka ah ayaa badanaa dhibanayaal u ah xadgudubka galmada marka loo eego saxafiyiinta ragga ah. Waxaa loo baahan yahay ilo dheeraad ah oo gaar u ah ka hortag jinsi, sida tababar iyo qiimeynno halista ah.
- *Hanjabaadda iyo aflagaadada, gaar ahaan khadka tooska ah:* Saxafiyiinta haweenka waxaa loo geystaa waxyello u geysaneysa sumcad xumo dabiici ah oo ay ku jirto, mug sare, hanjabaadyo cad oo rabshad galmo ah, aflagaado shaqsiyadeed iyo wareejinta macluumaadka gaarka ah ama sawirro qaawan.
- *Kadeedka galmada, goobta shaqada iyo sinnaan la'aanta bulshada:* Sinnaan la'aanta ragga iyo dumarka ayaa ka jirta warbaahinta iyo bulshada dhexdeeda, taasoo lagu muujiyey kala-duwanaanshaha mushaharka, tiro yar oo haween ah ayaa awood u leh inay u gulbaan heerarka go'aan-qadashada ama xakamayn la'aan markay noqoto kadeed galmo oo ay ula yimaaddaan asxaabta, ilo ama wareysiyo.

Cadaadiska bulshada ee ka dhanka ah haweenka inay ku soo biiraan darajooyinka xirfadaha ama waajibaadka qoyska, sidaas si lamid ahna haweenka jooga goobta shaqada. Isla mar ahaantaana, warbixintu waxay cadeyneysaa dhowr mashruuc, ololeyaal iyo howlo kale oo ay soo bandhigeen, oo ay ugu horreyn kooxaha bulshada rayidka ah ay kaga hadlayaan caqabadahaas aasaasiga ah.

In la sameeyo tabobar loogu talagalay haweenka, qiimeynnta halista, borotokoolka badbaadada iyo hagitaanno ay ku jiraan tixgelinta lab iyo dheddig, barnaamijyada wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah oo ay la socdaan dhaqaalaha haweenka loogu talagalay iyo tixgelinta xaaladda bulsho ee ay haweenku ku shaqeeyaan waddamada iyo daryeelka nafsi ahaaneed ee ka hadlaya xadgudubka galmada.

Hal tusaale waa barnaamijka gargaarka degdegga ah ee ay dhiseen Taageerada Warbaahinta Caalamiga (IMS) iyo suxufiyiinta Afgaanistaan. Dariiqooyin gaar ah oo loogu talagalay badbaadinta ama caawinta haweenka ayaa ah mid ka mid ah baahiyaha la taaban karo ee lagu cadeeyay warbixinta. Haweenka, waxaa lagama maarmaan ah oo loo baahan yahay in lagu daro marka laga hadlayo ka hortagga iyo wax ka qabashada, sida guddiga noocan oo kale ah (AJSC) oo bixiya barnaamij waxbarasho, Jimicsi, maskaxeed iyo taageero xagga sharciga ah oo loogu talagalay haweenka saxafiyiinta ah.

AJSC waxay magacowday isku duwayaal dheddig oo ka kala socda gobollada iyo Kabul. Dalka Neebaal, ururrada aan dawliga ahayn ee taageerada caalamiga ah ayaa abaabulay aqoon-is-weydaarsiyo xagga amniga ah oo loogu talagalay haweenka. Dhankaas, Ciraaq iyo Kenya, xorriyadda kooxaha ra'y i dhiibashada waxay soo saareen hagid amni oo loogu talagalay saxafiyiinta kuwaas oo qayb ahaan ka go'an haweenka saxafiyiinta ah.

Tani sidoo kale waa inay ku fiddaa farsamooyinka qaranka. Tusaale wanaagsan ayaa ah barnaamijka ilaalinta gobolka ee Kolombiya, oo leh raadad gaar ah oo ku saabsan dib-u-eegista hanjabaadaha ka dhanka ah haweenka, oo ay ka mid yihiin guddi qiimeynta kiisaska oo leh wakiillo ka socda ururrada xuquuqda haweenka iyo jawaabaha shaqsiyanka ah. Farsamooyinka soo koraya ee wali ku jira horumarka Soomaaliya iyo Nebaal waxaa loo habeeyay inay ku soo daraan wakiillo dheddig ah guddiyada dusha kala soconaya, in kasta oo aan labadan hawlood midkoodna weli ahayn mid shaqeynaya.

Warbixintani waxay ogaatay in dumarka saxafiyiinta ah si xad dhaaf ah loogu dhibaateeyo internetka taas oo haween badan lagu qasbay inay ka tagaan shaqadooda ama ay xakameeyaan waxa ay dhahayaan.

---

## “kadeedka galmaada gaar ahaan goobta shaqada waxaa loo tixgalinaya inay tahay khatar badbaado ee dhammaan haweenka sagaalka dal”

Kooxaha bulshada rayidka ah iyo ururrada taageera warbaahinta ayaa bilaabay dhowr mashruuc, sida ololaha (Byte Back) ee ka socda Koonfurta Aasiya oo dhan iyo shaqada Mu'asasada Xuquuqda ee 'Digital rights Foundation of Bakistaan', ujeedadooduna tahay in lagula dagaallamo xadgudubka khadka tooska ah ee internetka iyada oo loo marayo farriimaha wadajirka ah iyo hagitaan ku saabsan diiwaangelinta kiisaska iyo ololayaasha wacyi gelinta dadweynaha ee loogu talagalay in lagu garto laguna dhalleecceeyo dhibaatada.

Waddo kale oo lagu soo rogay waddamada qaarkood ayaa ah in lala shaqeeyo warbaahinta si loo wanaajijo qaabka ay uga jawaabaan weerarradan si loo hubiyo in saxafiyiintu leeyihiin waddo ay ku soo tebiyaan tacaddiyada ayna u fidiyaan taageero.

Kadeedka galmaada, gaar ahaan goobta shaqada, ayaa lagu soo waramayaa inay tahay halis khatar ku ah haweenka, ku dhawaad dhammaan sagaalka waddan iyo cilmi baarista caalamiga ah ayaa dib loogu eegay warbixintan. Qaabab badan oo loo maro sida loo wanaajijo dhaqanka ka dhex jira qolalka wararka ayaa la soo saaray sannadihiin ugu dambeeyay. Afgaanistaan dhexdeeda, kooxuhu waxay bilaabeen tilmaamo ka dhan

ah kadeedka galmaada ee xarumaha warbaahinta waxayna samaysteen guddi dhegaysta cabashooyinka ka dhanka ah saxafiyiinta haweenka. Hal koox oo ku sugar Kolombiya ayaa warbaahinta kala shaqeysa barnaamij shahaado ah oo loogu talagalay borotokoolka amniga iyo ka hortagga halista, taasoo ay ku jirto hirgelinta siyaasadaha takoorka iyo kadeedka galmaada.

Bakistaan gudaheeda, waxaa la soo bandhigay koox anshaxeed iyo mid jinsi ah oo warbaahineed oo la hawlala kooxaha warbaahinta. Gudaha Kenya, koox ka shaqeysa warbaahinta ayaa u keentay borotokoolka badbaadada suxufiyiinta qolka wararka oo leh qodobo jinsi. La socodka iyo hubinta dhaqangalkooduna wuxuu yahay deg deg.

Abuurista goleyaal si haweenka lloo isugu keeno waxay horseedi kartaa talaabooyin kor loogu qaadayo xasilloonida iyo aqoonsiga arrimaha sida caadiga ah u saameeya haweenka saxafiyiinta ah ee ku nool dal gaar ah. Soomaaliya gudaheeda haweenka saxafiyiinta ah ayaa isu yimid oo si guul leh uga dooday fasaxa mushaharka dhalmada ee haweenka tobanka xarumood ee warbaahinta waxayna sidoo kale sameeyeen qorshe hawleed loogu talagalay qolalka wararka si loo joojiyo kadeedka galmaada. Haweenka ku nool Kolombiya ee saxafiyiinta ah waxay si sii kordheysa sheekadooda ku saabsan kadeedka galmaada iyo sidoo kale iyagoo ka shaqeynaya sidii loo kor loogu qaadi lahaa kahortaga rabshadaha ku saleysan jinsiga iyo arrimaha kale ee gaarka ah ee jinsi.

Si loo helo faham sax ah oo ku saabsan hanjabaadaha loo geysto saxafiyiinta haweenka iyo si loogaga jawaabo hababka ugu habboon ee jawaab celinta, waxaa loo baahan yahay xog la kala saaray oo ku saabsan weerarrada ka dhanka ah suxufiyiinta. Kooxo isa soo taraya oo kormeeraya Afgaanistaan, Ciraaq iyo Kolombiya iyo kuwa kale ayaa samaynaya sidan, waxaan jira kowo kale oo nidaamsan, laakiin way yaryihii haddii ay jiraan maamullo sameeya. La'aanta heerar guud oo ku saabsan la socodka xogtan adduunka waa hal aag oo warbixinta loo aqoonsaday inay tahay muhiimadda koowaad.



Sawirkan oo la qaaday 16kii Abriil, 2018, dadku waxay ka baxeen kaniisadda kaddib markii Baaderiga (Archbishop-ka) Malta uu u sameeyay xus weyn saxafiyyaddii la dilay Daphne Caruana Galizia. Sadex nin ayaa loo qabtay dilkii Daphne Caruana Galizia oo 53 jir ahayd, taasoo ku dhimatay dalkeeda Malta qarax baabuur gaari loo adeegsaay 16 Oktoobar 2017. Raggaasi way qirteen dampiga laakiin waxaa lagu tuhunsan yahay inay fuliyeen weerarka iyagoo wakii ka ah gof kale. Sawir: Matthew Mirabelli / Agence France-Presse / Ritzao Scanbex

# Saxafiyiinta haweenka: Wajahidda halis labajibbaaran

Rabshadaha ka dhanka ah suxufiyiinta ayaa ah adduunku ka welwelaan. Xirfadlayasha lab iyo dhaddig ee warbaahinta, qorayaasha iyo hawl wadeennada kale ee warbaahinta ayaa si isa soo taraysa loogu bar-tilmaameedsanayaa warbixintooda. Si kastaba ha noqotee, haweenku waxay la kulmaan halis sii kordhaysa sababta oo ah dayacnaantooda gaarka ah ee ay weheliso jinsiga.

Waxaa loo geystaa weerarro la mid ah kuwa ay raggooda la kulmaan - dil, xabsi, weerarrada jir ah iyo weerarro nafsi ah, cabsi gelin, kadeed, hanjabaad

Waxay sidoo kale la kulmaan khataro uga yimaad meelo deegaan ahaan iyo dhaqan ahaanba “nabdoon”, sida qolalkooda war-diyarinta,<sup>2</sup> iwm, laakiin rabshadaha ka dhanka ah waxaa badanaa lagu muujiyaa qaab galmo kufsi ah. Waxay u nugul yihiin weerarrada kaliya maahane waxaa la mid ah kuwa iskudaya inay aamusiyaan baahidooda, waxayna kuwaasi uga yimaaddaan saaxiibbadood, iyo xitaa xubnaha qoyska. Caadooyinka dhaqanka iyo dhaleeceynta ayaa waxaa wehelisa kalsooni darro ay ku qabaan horjoogayaashooda iyo mas'uuliyiinta inay wax ka qabtaan cabashadooda si loo niyad-jabiyo soo tebinta rabshadaha ku saleysan jinsiga. Macnaha guud, aamusnaanta ayaa sarreysa

Tirada haweenka saxafiyiinta ah ee la dillo ayaa si joogto ah u korodha. Sida laga soo xigtay UNESCO, 2012, waxaa la xisaabiyay 4% oo ka mid ah 119 oo ah dadka ka shaqeeya warbaahinta ayaa la dilay, laga soo bilaabo 2017, tiradan waa sii korodhay iyadoona sare u sii kacday 14% oo ka mid ah 80 dhibanayaashii la diiwaangeliyey sanadkaas. Sanadka 2018, boqolkiiba wuxuu ahaa 7%. Intaas waxaa sii dheer, haweenku waxay ka xisaabtamaan inta badan kiisaska xadgudubka galmaada iyo kadeedka ka haysta internetka.

Marka loo eego daraasad caalami ah oo ay sameysay Hay’adda Warbaahinta Caalamiga ah ee Haweenka (IWMF) iyo (Troll-Busters) oo u taagan ka hortagga xadgudubka khadka tooska ah, ku dhawaad seddex meelood labo meel dumarka saxafiyiinta ah ayaa loo hanjabay ama loo dhibaateeyay khadka tooska ah, halka 26% la jidhdilay

Daraasaddan oo cinwaankeedu yahay “Weerarrada iyo kadeedka galmaada - Saamaynta ay ku leeyihiin haweenka saxafiyiinta ah iyo wararkooda,” ayaa shaaca ka qaadday in ku dhawaad 70% jawaab-bixiyaasha ay tilmaameen in qof dumar ahi ay qayb ka ahayd weerarrada. Sidaas si la mid ah markii la eego dhibaatooyinka jir ahaaneed ay reebeen, waxay weerarran leeyihiin saameyn weyn oo xaggaa maskaxda ah. Xaqiqidii, sedex meelood meel Jawaab-bixiyaasha ayaa sheegay inay soo gaareen dhaawac xaga jirka, maskaxda iyo mid shucuureed kaddib dhibaatada loo geystay. Xaaladda ayaa xitaa ka sii adag marka la eego kuwa iskood u shaqeysta. Ra’iyi ururinta ayaa muujineysa in haweenkani ay dareemayaan xitaa kalsooni yari. Sidaas awgeed, saddex-meelood meel ka mid jawaab-bixiyaasha ayaa sheegay inay kalliftay iney ka fiirsadaan inay ka baxaan shaqada, halka in ka badan saddex-meelood meel ay ka fogaadaan soo tebinta sheekoyinka halista gelin kara naftooda.

In kasta oo tirakoobyadan walaac laga muujinayo, Xarunta Dart ee Saxafiyiinta iyo dhib-gocashada (Dart Center for Journalism and Trauma) waxay sheegtay in kaliya 26% tababarka baadqabka saxafiyiintu ay ku jirto tixgalinta jinsiga, halka 8% haweenka saxafiyiinta ah loo geystey xadgudub galmo. Kaliya 3% ayaa kaqaybqaatay tababarka kadeedista internetka.

Xaaladda ayaa in yar ka roon dhanka dijitaalka. Ururka Isgaarsiinta Horukaca (APC) wuxuu soo saaray in haweenka saxafiyiinta ah ay kamid yihiin kooxaha sida joogtada ah loo bar-tilmaameedsado markay tahay shaqaaqada internetka.

Weerarrada tooska ah ee lagu qaado dumarka warbaahinta ka shaqeeya ayaa had iyo jeer la xiriira galmada. Sida laga soo xigtay Ururka (Karisma Foundation), weerarradan waxay u muuqdaan inay bartilmaameed joogto ah ka dhigtaan xiriirkha shaqsiyadeed, qoys iyo u adeegsiga cayda la xiriirta muuqaalka jirka iyo awooddha caqliga. Hanjababo dhif ayay ku timaadaa natijjado toos ah oo ka dhalata fikradaha haweenka ama doodaha, laakiin waxaa loo og yahay inay tahay haweenay nafteeda u fikireysa una hadlaysa si ku habboon.

Khataraha khadka tooska ahi waxay u dhexeeyaan khataraha: kadeedka galmada ee khadka tooska ah ee intenetka, weerarada la bartilmaameedsado oo had iyo jeer ku lugta leh hanjabood galmo. sidoo kale waxaa ku jiraan jebinta amniga dijitaalka ah. Mararka qaarkood, kadeedka galmada waxaa lagu fulin karaa si dadban iyada oo loo adeegsanayo muujinta nacayb shaqsiyadeed. Hase yeesh, sida uu caddeeyay Machadka Sakaafadda Caalamiga ah (IPI), waxaa si cad ugu muuqata in deegaanno badan oo siyaasadeed uu ka jiro kadeedka khadka tooska, waxaa kaloo jira natijo laysku hallayn karo, oloyeaal abaabulan si loo aamusyo loogana takhaluso macluumaad muhiim ah.

Marka loo eego daraasadaha IWMF iyo TrollBusters ee kor lagu soo xusay, kaliya 4tiiba 10 haween saxafiyiin ah ayaa soo sheegay in xadgudub lagula kacay ee uu u gaystay kormeeraha, in ka badan kala badhna waxay dareemeen inaan waxba laga qaban doonin arrinkaas. Mid ka mid ah gunaanadka daraasaddan ayaa ah in xadgudubka khadka tooska ah iyo kanaan tooska ahayn intaba ay u liidato kaasoo ay hoos u dhigaan maamulayaasha warbaahinta iyo kuwa kale oo haysta kaalimo wanaagsan si ay taageero u bixiyaan. Dhaqanka aamusnaanta iyo isla xisaabtanka oo oo yaraaday dartiis ayaa sababay dhaawaca. Marka loo eego daraasadda IWMF iyo TrollBusters ee kor lagu soo xusay, kaliya 4-tiiba oo ka mid ah 10 haween saxafiyiin ah ayaa soo sheegay kormeeraha in xadgudub lagula kacay, in kabaden kala badhna waxay dareemeen inaan waxba laga qaban doonin arrinkaas. Mid ka mid ah gunaanadka daraasaddan ayaa ah in xadgudubka khadka tooska ah iyo kan aan tooska ahayn intaba. Waxay u muuqdaan inay hoos u dhigayaan ahmiyada maareynta warbaahinta waxayna hoos u dhigayaan mas'uuliyiinta iyo kuwa kale ee kujira kaalinta wanaagsan haddii ay noqoto taageerabixinta.

Hay `adda Cilmi-baarista Karisma Foundation waxay kaloo ogaatay in mid ka mid ah niyadjabka ugu weyn ee ay muujiyeen saxafiyiinta haweenka ah ay tahay la'aanta garhaarka saxda ah haddii ay dhacdo farriinta lagu dulleeyo. Xiriirrada shakhsiyadeed iyo kuwa xirfadleyda ah ayaa badanaa waxay kula taliyaan iyaga, si kasta oo ay ugu jeedaan ujeeddadooda wanaagsan, inay iska dhegatiraan faallooyinka oo ay abuuraan dareen awood la'aan. Daraasadda APC ayaa sidoo kale daaha ka qaadday jawaab-celino liidata oo ku saabsan xadgudubyada ku saleysan jinsiga ee khadka tooska ah ee shabakadaha internetka. Tani waxay ku keeni kartaa qalbijab xorriyadda hadalka, Intaas waxaa sii dheer, Shuruudaha Adeegga oo u horseedi kara faafreeb ku yimaada aaladaha adeegsadaasha

kale (iyada oo lagu soo gudbinaayo warbixin) ama is-faafreeb iyada oo aan dhab ahaan la laga xaalmarin dhibtii bartirmaameedsiga amaba magdhaw

Hay ` adda Cilmibaarista ee Karisma waxay kaloo ogaatay in mid ka mid ah niyadjabka ugu weyn ee ay muujiyeen saxafiyiinta haweenka ah ay tahay la ` aanta taageerada saxda ah haddii ay dhacdo farriin lagu dullaynayo. Xiriirada shakhsiyadeed iyo kuwa xirfadleyda ah, in kasta oo ay leeyihiin ujeeddada ugu wanaagsan, inta badan waxay kula taliyaan inay iska dhegatiraan faalloyinka oo ay abuuraan dareen awood la'aaneed.

Sahamada baarista ee APC ayaa sidoo kale muujineysa jawaab-celin-xumo ku saabsan rabshadaha ku saleysan jinsiga ee ka yimaada shirkadahada shabakadaha internetka.

Warbixin cilmi-baaris ah oo ay sameysay hay ` dda ku lugta leh ee xuquuqda aadanaha ee (Amnesty International) oo cinwaan looga dhigay “Toxic Twitter: oo ah Twitter sun ah oo loogu talagalay haweenka” waxay muujineysaa khibradaha khaaska ah ee rabshadaha iyo xadgudubka lagu sameeyo Twitterka ee lagula kaco haweenka madow, haweenka qowmiyadaha ama diinta laga tirada badan yahay badan iyo dumarka naafada ah. Baadhitaanku wuxuu shaaca ka qaaday nooca is-goysyada ee xadgudubka oo ka dhaca goobta, isagoo ku dooday “Twitterku wuxuu u noqon karaa haweenka aalad awood badan si ay xiriirro u yeeshaan oo ay naftooda u muujiyaan. Laakiin dumar badan wuxuu Twitterku ugana dhigan yahay goob ay rabshadaha iyo tacaddiyada ka dhanka ah ay ku badanayaan, sida bandanna ay ku yaryihiin isla xisaabtanka.”

Wadamada badankood, caadooyinka asalka u ah bulshada iyo fikradaha jinsi ee waxyeellada leh waxay caqabad weyn ku yihiin in haweeneyda ay awood u leedahay inay ka raadsato shaqo mehnadda saxaafadda sida ragga ay u raadsadaan oo kale. Fikrado badan ayaa laga qabaa aragtida ah in saxafinimadu ahayn xirfad ku “ku habboon” haweenka. Tani waxay sababi kartaa cadaadis bulsho oo weyn oo ka hor-istaagaysa inay soo galaan xirfaddan, ama ka baxaan.

Sinnaanta helitaanka iyo fursadda saxafiyiinta haweenka ayaa ah caqabad. Sannadkii 2011, Warbixinta Caalamiga ah ee Xaaladda Haweenka ee Wararka Warbaahinta ee ay sameysay IWMF waxay muujisay inkasta oo ay sii kordhayaan tirada haweenka saxafiyiinta ah, haddana saqafka quraaradda (Sinnaan la ` aanta jagada) ayaa wali ka celinaya haweenka inay qabtaan jagooyinka mas’uuliyadaha.

Intaa waxaa sii dheer, daraasad ay sameeyeen Ururka Caalamiga ah ee Saxafiyiinta (IFJ) iyo hay ` adda (Wageindicator) ee khariiddada Mushaharka ayaa muujinaysa farqiga mushaharka ee saxaafadda, iyadoo ragga ay kasbadeen in ka badan 14 ka mid ah 16ka dal ee la baaray iyo celcelis ahaan farqiga u dhhexeeya 16% dalalka Midowga Yurub

Daraasad kale oo ay sameysay IFJ oo kaashaneysa Shabakadda Iskuxirka Warbaahinta Koonfurta Aasiya (SAMS) waxay soo gabagabeysey caqabadaha ugu waaweyn ee ay wajahaan haweenka gobolka: (1) takoorka noocyada shaqada ee loo xilsaaro, iyadoo raggalasiyo xornimo dheeraadah, iyadoo raggaloo xilsaaro sheekooyinka ku saabsan siyaasadda ama dhaqaalaha; (2) fursado aan sinnayn oo loogu talagalay dhiirrigelinta iyo; (3) faa'iido la`aanta dhalmada iyo taageerada liidata ee hooyooyinka shaqeeya. Dhamaan qodobbadaas oo dhan ayaa haweenka saxafiyiinta ah ka dhigaya meel aad uga sii duran oo khatar badan marka loo eego ragga ay wada shaqeeyaan. Natiijooyinkaas waxaa loo gudbin karaa gobollada badankood ee adduunka. Sahan kale oo ay sameeyeen suxufiyiinta haweenka ee Koonfurta Aasiya iyo Baasifigga kaasoo



Weriye Afgaanistaan  
ah oo xidhan qalafka  
amniga inta uu ku  
gudajiro tebinta  
doorashooyinka,  
Oktoobar 2018. Sawir:  
AJSC / IMS

ay sameeyeen IFJ, UNESCO iyo UN Women waxay muujisay in kadeedka galmaada ay u tahay arrintan fure. Ku dhawaad 35% xirfadleyda ayaa sheegtey inay goob joog u ahaayeen kadeed galmo shaqada dhexdeeda. 'Ceeb' iyo 'cabsi dib-u-eegis' ayaa sababaha ugu badan ahaa ee ay dhibbanayaashu uga warbixin waayeen shilalka. Ahaanshaha haweeney weriye ah waxaa ka mid ah caqabado gaar ah, sidoo kale ka warbixinta arrimaha haweenka.

Sanadihi 2016 iyo 2017, Saxafiyiinta aan Xudduudda Lahayn (RSF) ayaa diiwaangeliyay in ka badan 60 kiis oo in ka badan 20 waddan oo xuquuqda saxafiyiinta ah lagu xadgudbay iyadoo lala xiriirinayo warbixintooda ku aaddan arrimaha ay la kulmaan haweenka.

Intaa waxaa sii dheer, waxyabaha ay ka kooban tahay warbaahinta ayaa sidoo kale takooraya haweenka, kuwaas oo xisaabiya 24% oo keliya dadka ay maqleen, wax ka akhriyaan ama ku arkeen daafaha, wararka telefishanka iyo wararka raadiyaha, iyo keliya 19% khubaro la tashatay. Tani waxay ku dhowdahay saamiga haweenka la wareystay inay yihiin afhayeenno (20%), sida laga soo xigtay Mashruuca Korjoogteyn taama la socodka Warbaahinta Caalamiga ah ee 2015.

In kasta oo ayan toos ula xiriirin rabshadaha ka dhanka ah saxafiyiinta haweenka, haddana waxaa jira jowi ay dumarku ku khaldan yihiin oo keeni kara in marar badan si aad ah loogu galmoodo, abuurayana jowi awood u leh rabshadaha ka dhanka ah haweenka. Saxafiyiinta leh muuqaalka guud ee bulshada ayaa si gaar ah ugu nugul arrintan.

Sida uu sheegay Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoo bay, "heer bulsho ballaaran, rabshadaha iyo waxa ka iman kara waxay sii murjinayaan takoorka iyo sinnaan la'aanta, waxayna saameynayaan xuquuqda qof walba u leeyahay xorriyadda hadalka iyo ra'yii dhiiibashada, oo ay ku jiraan xuquuqda macluumaadka, waxayna wiqayaan dimoqraadiyadda". Sidaa darteed, waxaa la joogaa waqtigii li qaadan lahaa hanaan jinsi si loo hubiyo in walaaca haweenka saxafiyiinta si wax ku ool ah wax looga qabto.

# Ururrada dowliga ah ma waxaa ka go'an badbaadada saxafiyiinta haweenka ah?

Istaraatijiyyaddii ugu horreysay ee Qaramada Midoobay (UN) ee ku saabsan badbaadada suxufiyiinta, Qorshaha Qaramada Midoobay ee Tallaabada Nabdoonaanta Saxafiyiinta iyo Arrinta la-aanta (2012), waxay cadeynesaan inay ku saleysan tahay mabda'a ku saleysan hab jinsi jinsi iyo wicitaanno. in la hubiyo in lamaanaha loo wajaho kobcinta amniga suxufiyiinta iyo la dagaallanka ciqaab la'aanta.

Isla sanadkaas, warbixintii uu soo saaray Wakiilka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee ku saabsan kor u qaadista iyo ilaalinta xuquuqda xorriyadda fikirka iyo ra'yiga, Frank La Rue, wuxuu iftiimiyah baahida loo qabo in la helo qaab ku saleysan jinsi marka la tixgelinayo tallaabooyinka wax looga qabanayo arrinta rabshadaha ka dhanka ah suxufiyiinta.

Sidoo kale sanadkii 2012, qaraarkii ugu horreeyay ee Golaha Xuquuql Insaanka (HRC) ee ku saabsan badbaadada suxufiyiinta ayaa qirey "khatarta gaarka ah ee ay la kulmaan haweenka saxafiyiinta ah marka ay gudanayaan howshooda, waxayna hoosta ka xarriiqeen, muhiimadda ay leedahay in la qaado tallaabo qaab jinsi ah oo xasaasi ah, marka laga fikiraayo tillaaboooyinka wax looga qabanayo amniga saxafiyiinta".

Go'aannada is xigxey oo ay sameeyeen HRC iyo Golaha Guud ee Qaramada Midoobay (UNGA) ee ku saabsan badbaadada suxufiyiinta ayaa xusey ahmiyada ay leedahay in qaab jinsi la kaashado.

Qaab-dhismeedkiisa 2222 (2015), Golaha Amniga ee Qaramada Midoobay wuxuu kaloo aqoonsaday khataraha gaarka ah ee soo food saaray haweenka suxufiyiinta, xirfadlayaasha warbaahinta iyo howl-wadeennada la xiriira sameynta shaqadooda wuxuuna hoosta ka xarriiqay muhimadda tixgelinta jinsiga ee tallaabooyinka wax looga qabanayo nabadgelyadooda xaaladaha iskahorimaad hubaysan.

Sannadkii 2017, Golaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu meel mariyey qaraar ku saabsan badbaadada suxufiyiinta iyo arrinta la xisaabtanka iyada oo si xoog leh diiradda loo saaray jinsiga. Waa takooridda ku saleysan jinsiga, oo ay ku jirto cabsi gelin, khadka tooska ah iyo khadadka internetka iyo qalalaasaha, kicinta nacaybka, sinnaan la'aanta iyo fikradaha ku saleysan jinsiga; in haweenka loo oggolaado inay galaan isla markaana ay sii ahaadaan saxafiyiin iyada oo loo eegayo shuruudo isla'eg iyo in la hubiyo in waaya-aragnimada iyo dareenka suxufiyiinta haweenka si wax ku ool ah wax looga qabto iyo fikradaha jinsi ee ka jira saxafadda si ku-meel-gaar ah wax looga qabtay."

Si kastaba ha noqotee, ma ahayn ilaa 2017 in nidaamka isku-dhafku uu isku dayo inuu baaro shuruudaha facil ahaan la soo bandhigi karo iyo waxyabaha ka dhalan kara qaabka dareenka labka iyo dheddigga. Warbixinta uu soo saaray Xoghayaha Guud ee

AJI waxay leedahay la-taliye jinsi si kor loogu qaado sinnaanta labka iyo dheddigga ee qaybta warbaahinta. In kasta oo AJI ay kormeerayso weerarrada ka dhanka ah suxufiyiinta, wali ma hayso xog gaar ah oo ku saabsan galmada, in kasta oo ay diiwaangelisay ugu yaraan toddobo kiis oo ah faraxumeyn afartii sano ee la soo dhaafay. AJI waxay u qabanqaabisaa tababbar ku saabsan badbaadada saxafiyiinta ragga iyo dumarka.

## Ciraaq: Sameynta wax aan la arki karin, muuqdana.



Qalalaasaha siyaasadeed ayaa ka dhigay Ciraaq mid kamid ah waddamada ugu halista badan suxufiyiinta adduunka. Arintan awgeed, cilmi-baarayaashu waxay yiraahdaan, “la yaab maahan in xaaladaha saxafiyiinta haweenka Ciraaq inay la kulmaan qaar ka mid ah kuwa ugu xun adduunka”. Sanadihi la soo dhaafay, waxaa sii kordhaysay tirada haweenka soo galaya xirfadda suxufinnimada, laakiin weli waa tiro yar. Sidaas oo ay tahay, intii u dhaxeysay 2003 ilaa 2013, 28 haween saxafiyiin reer Ciraaq ah ayaa la dilay. Intaas waxaa sii dheer, sanadkii 2006dii daraasad ay ssameysay hay'adda Burj Babel ayaa xaqijineysa in haweenku ay la kulmaan weerarro ka badan kan ragga. Xaaladda ay ku shaqeeyaan saxafiyiinta reer Ciaaq ayana la shaqeyn Karin caqabadaha kaladuwani ee horyaal awgood.

Sida lagu xusay daraasad ay sameeyeen Ururka Suxufiyiinta Haweenka ee Ciraaq (IWJF), ayaa qodobbada ugu waaweyn ee lagu soo qaataay baa waxaa kamid ah, takoorista jinsi, kadeedka, kala-sooca, iyo guud ahaan caddaalad-darrada iyo sinnaanta. Sanadkii 2017 warbixin ay soo saareen Ururka Xuquuqda Suxufiyiinta Ciraaq

---


## “Weerarradu waxay ka bilowdaan goobta shaqada.”

(IJRDA) ayaa lagu sheegay: “In kasta oo tirakoobka laga soo uruuriyay sahanka ra'yii ururinta iyo warbixinnda saxaafadda waxay xaqijinayeen in ka badan 65% haweenka saxafiyiinta ah in loo dhibaateeyo si joogto ah, had iyo goor way diidaan inay soo sheegaan Xadgudubyada noocan ah, waxaana sabab u ah nooca xaaladaha bulshada, iyo caadooyinka iyo dhaqanka lama taabtaanka ah ee ka dhexjira bulshada Ciraaq”. Si kastaba ha noqtee, ku guuldareysiga in la soo sheego dhacdooyinkaan ayaa muujineysa in rabshadaha noocan ah ay si weyn u qarsoon yihiin, oo loo arkaa inay yihiin arrimo aan laga hadli Karin maadaama ay salka ku hayaan dhaqanka iyo caadooyinka. Xaaladaha

badankood, haweenku waxay sheegeen inay ka baqayaan inay waayaan shaqooyinkooda oo lagu eeddeeyo weerarro. Dadka la wareystay waxay sheegeen inay ku kalsoon yihii nidaamka garsoorka, sida uu sheegay ururka Burj Babel. Daraasad kale oo ay sameysay Ururka Haweenka Ciraaq ee Madasha Saxaafadda (IWWF) waxay intas ku dartay in inta badan weerarradan ay geystaan siyaasiyiin, waxaa ku xiga maamulayaasha ururka warbaahinta, kaddibna asxaabtooda. Weerarradu waxay ka bilowdaan goobta shaqada, sida laga soo xigtay Burj Babel, qaar kamid ah caqabada ugu waaweyn ayaa ah la'aanta sharchiyo ilaaliya xuquuqda haweenka, waxaana taas kasii daran maqnansha sharchiyo la dagaallanka kadeedka ka jira xarumaha warbaahina. Xoojinta sharciga kahortagga tacaddiyada ku saleysan jinsiga ayaa weli ah mudnaanta, sida lagu sheegay warbixin ay soo saartay Hay'adda Sare ee Xuquuqda Aadanaha sanadkii 2015.

Falanqaynta dhibaatada tacadiyada ka dhanka ah haweenka warbixinnda ayaa ah tillaabada ugu horreysa ee qaabeynta jawaab wax ku ool ah. Haweenku sidoo kale waxay hogaaminayaan wax ka qabashada xaalada. Ururo ay ka mid yihii IWJF, Ururka Saxafyiinta Haweenka aan Xudduudda Lahayn, iyo Burj Babel ayaa dhammaantood ka shaqeeynaya arrintan. Tan dambe waxay la socotaa weerarada ka dhanka ah suxufiyiinta, waxayna bixisaa xog ku saabsan kalasooca jinsiga si kor loogu qaado wacyiga tirada weerarrada, waxayna sameysay barnaamij lagu horumarinayo xiriirka ka dhexeeya saxafyiinta iyo ciidamada amniga. Waxay soo saartay hage-tababbar oo muujinaya baahida loo qabo in kor loo qaado wacyiga dhammaan suxufiyiinta, rag iyo dumarba, halista kufsiga, iyagoo ku doodaya in la kordhiyo wakiillada haweenka ee ciidammada amniga sida ugu weyn ee loo wanaajin karo xiriirka bulshada.

## Kenya: Kor u qaadista wacyiga



Weerarrada ka dhanka ah suxufiyiinta Kenya ayaa kordhay sannadihii ugu dambeeyay, gaar ahaan xilligii doorashada 2017.

Wadarta 94 dhacdo oo rabshado wata oo ka dhan ah suxufiyiinta, oo ay ku jiraan boggaga internetka iyo bahda warbaahinta, ayaa lagu diiwaangaliyay Qodobka 19aad oo laga soo bilaabo Abril 2017 illaa May 2018. Warbixintu waxay shaaca ka qaadday in muddooyinkan, weerarrada jirka iyo hanjabaadaha ay kordheen tiro ahaan, darxumada iyo naxariisdarro. Weerarrada qaar ayaa sababay dhaawacyo halis ah iyo waxyeelo qalab, gaar ahaan xilligii doorashada. Warbixinta, si kastaba ha ahaatee, kuma jiraan macluumaadka la kala soocay ee jinsiga ee ku saleysan xadgudubyada ku saleysan jinsiga ee loo geysto shaqaalaha warbaahinta haweenka. Farqiga u dhexeeya diiwaangelinta hanjabaadyo gaar ah iyo rabshado ka dhan ah saxafyiinta haweenka ah ayaa caan ka ah goobtan, sida ay xustay kooxda ka shaqeysa Saxaafadda Kenya (KMWG).“

Tani waa arrin xasaasi ah dadka badidoodna ma doonayaan inay ka hadlaan arrintaas inkasta oo ay qirayaan inuu jiro. Intooda badan waxay ka baqaan inay la wadaagaan, sababta oo ah waxay ka baqayaan inay waayaan shaqadooda ama la cabsigeliyya, "ayay tiri Helen Obande, Agaasimaha Ururka warbaahinta Haweenka Kenya. Mid ka mid ah daraasadaha aadka u yar ee ku saabsan haweenka saxafyiinta ah ee Kenya

waxaa soo diyaarisay Golaha Warbaahinta ee Kenya (MCK) sanadkii 2015 iyadoo la kaashanaysa UNESCO.

“Ajendaha Jinsiga: Qiimaynta arrimaha jinsiga ee warbaahinta Kenya” waa tusaale wanaagsan nooca warbixinta oo gacan ka geysan karta hagaajinta xaaladda saxafiyiinta haweenka ah, laakiin waxaa ka maqan falanqayn gaar ah oo ku saabsan khataraha amniga. Warbixintu waxay soo saartay in ururrada warbaahinta ee Kenya ay shaqeeyaan iyada oo aan la hayn tilmaamo sax ah iyo hab ama nidaam la xiriira jinsiga. Sidaa darteed waxay ku talineysaa in dukumiintiyadan iyo hababkan la soo saaro oo lagu faafiyo xarumaha warbaahinta, wacyigelinta ahmiyaddoodana waa la dammaanad qaaday. Golaha Warbaahinta Kenya ayaa ka shaqeynayay arintan tan iyo sanadkii 2015, isagoo u doodaya hababka jinsi kaasoo xaqiijinaya jawi aan takoor ahayn ee haweenka, hubinta jawi aan takoor ahayn ee haweenka, laga soo bilaabo farqiga u dhexeyya shaqada rag iyo dumar iyo kadeedka galmada. Xogta ayaa sidoo kale muujineysa in haween tiro yar oo ka mid ah warbaahinta ay qabtaan jagooinka hogaaminta iyo in ay sii kala liitaan marka la eego kartida tasoo ay sabab u tahay la'aanta tixgalinta baahiyaha ku saleysan jinsiga inta lagu gudajiro howlaha goobta. Natiijooinkaas waxaa xaqiijiyey barnaamijka ‘African Barometer’ ee Kenya, kaasoo kashifaya faraqyo badan oo aan ahayn kaliya magacaabista haweenka xilalka sare, laakiin sidoo kale abuurista siyaasadaha iyo jawiga shaqada ee kobcinaya sinnaanta jinsiga si kor loogu qaado haweenka. Tani waxay ka tarjumaysaa kaalinta 137-aad ee Kenya kaga jirto sinnaanta Jinsiga ee UNDP.

Warbixin ay soo saartay Ururka Saxafiyiinta Haweenka Kenya sanadkii 2017 iyo qodobka 19 ayaa si faahfaahsan uga hadlaya kororka weerarrada tooska ah ee loo geysto shaqaalaha warbaahinta haweenka, oo ay ku jiraan handadaad internetka ah, kadeed galmo, daba-socod iyo adeegsi aan la fasixin ee macluumaadka shaqsieyed, oo ay ku jiraan sawirro iyo fiidowyo.

75% haweenka saxafiyiinta ah ayaa la kulmay kadeedka khadka tooska ah intii ay shaqadooda ku jireen. Jawaabaha sahaminta waxay sidoo kale muujiyeen in tiro aad u badan ay soo maren ‘weerar laba waji leh’, halkaas oo loogu dhibaateeyay natijada ka soo baxday warbixintooda, isla mar ahaantaana loo bar-tilmaameedsaday inay yihiin haween, ama xitaa loo weeraro lab ama dheddig ahaan ama asal ahaantooda. In kasta oo tirooyinkaani walwal badan yihiin, haddana waxaa sii daran oo ah xaqiqiada ah in 43% dhibbanayaashu aysan wax tallaabo ah qaadin, in kayar 10%na waxaa weerarku u geystay shaqaalahooda. Warbixin kale oo ay sameysay AMWIK ayaa bixinaysa tusaale wanaagsan oo ku saabsan wacyigalinta wax ku oolka ah, iyadoo wajiyada loo mariyo sheekooyinka kadeedka khadka tooska ah ee ay kula kulmaan haweenka saxafiyiinta. Mid ka mid ah dadaallada nabdoonaanta ee loogu talagalay wax ka qabashada rabshadaha ka dhanka ah suxufiyiinta waa tababbarka, oo ay ka mid tahay dhisidda awoodda gaar ah ee haweenka. Cutubka Kenya ee Ururka Caalamiga ah ee Haweenka ee Raadiyaha iyo Telefishanka (IAWRT), wuxuu tusaale ahaan u soo bandhigay dhisme daryeel oo haweenka loogu talagalay iyada oo lala kaashanayo AMWIK iyo MCK. Kooxda Shaqada Sakaafadda ee Kenya (KMWG) ayaa daabacday buugga badbaadada saxafiyiinta oo lagu magacaabay “Joogitaan nabdoon: hage loogu talagalay ilaalinta suxufiyiinta Kenya” inkasta oo diiradda la saaray labbiska iyo dhaqanka, haddana waxay cutub siinayaan haweenka.

Isku day ah in lagu aqoonsado xallinta qaab dhismeedka muddada dheer, KMWG waxay sidoo kale sameysay borotokool ku saabsan badbaadada iyo ilaalinta saxafiyiinta iyo in ay qaataan xarumaha warbaahinta.

Waxay qiraysaa kadeedka galmaada inay caqabad ku ah saxafiyiinta haweenka waxayna soo jeedineysaa howlo wacyigelin ah oo ay weheliso tillaaboooyin ilaalin oo gaar ah oo wax looga qabanayo arrimaha jinsiga iyo arrimaha xasaasiga ah sida kadeedka galmaada, in kastoo aysan bixin hagitaan faahfaahsan oo arrintan ku saabsa. MCK waxay diyaarisay tilmaamaha ka soo warbixinta doorashada ee ay ka mid yihiin soo gudbinta dareenka jinsi iyo ilaalinta. KMWG sidoo kale waa qayb ka mid ah dadaallada ay dardar geliso UNESCO si loo soo saaro hanaan badbaado qaran. In kasta oo isuduwidda ka dhexeysa wakiillo kala duwan ay soo hagaagtay, haddana caqabado ayaa weli jira. Gaar ahaan baahi weyn ayaa loo qabaa is waafajinta guud ee dhinacyada muhiimka ah ee nabadjelyada suxufiyiinta, amniga iyo samafalka, sharci dejinta iyo dib u habeynta nidaamyada, dhisida awoodda iyo teknolojiyadda suxufiyiinta, ururrada saxafiyiinta, xorriyatul qowlka, xorriyada saxaafada, helitaanka macluumaadka iyo warbaahinta iyo jinsiga.

## Neebaal: Sinnaan la'aanta goobta shaqada



Neebaal waxay gashay kaalinta 118aad ee Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Horumarinta Sinnaanta Jinsiga. In kasta oo ay jirto fursad loogu talagalay in lagu wanaajivo, xaaladda haweenka Neebaal ayaa soo hagaagtay tobankii sano ee la soo dhaafay, gaar ahaan qaybta dadweynaha. Haweenku wali waxay la xisaabtamaan kaliya rubuc ka mid ah mihnadlayaasha warbaahinta, waxayna sii wadaan inay kala kulmaan takoor goobta shaqada, oo had iyo jeer ka muuqato nooca shaqosiintooda. Sida uu sheegayo Mohna Ansari, oo ah Wakiilkha Guddiga Qaranka ee Xuquuqda Aadanaha ee Neebaal, haweenka saxafiyiinta waa in la xoojiyyaa, waxayna tani ku bilaabmaysaa talaabooyin ay ka mid yihiin meeleyn ama shaqaalayn lagu daboolayo siyaasada iyo dhaqaalaha. In kasta oo Nidaamka Isgaarsiinta Mass ee la ansixiy sanadkii 2016, waxaa loogu yeeray warbaahinta inay kordhiso wakiillada haweenka, Amika Rajithala, Guddoomiyaha Ururka Saxafiyiinta Haweenka shaqeeya ayaa ku waramaysa in xarumaha warbaahintu aysan awoodin inay hirgeliyaan taas. Sida lagu sheegay daraasad ay sameysay Ururka Caalamiga ah ee Saxafiyiinta (IFI), nabadjelyaddarrida haweenka ee xagga shaqada iyo duruufaha shaqo ee liita ayaa dhaliyay dareen cabsi iyo xasiloonidarro leh. Tani, marka lagu daro saacadaha shaqada ee aan caadiga ahayn, sinnaanta Jinsi ee warbaahinta, gaadiid la'aan, mucaaradka xubnaha qoyska iyo mas'uuliyyadooda qoyska ee lamahuraanka ah ayaaweli ah caqabadaha ugu waaweyn ee haysta haweenka saxafiyiinta ah ee reer Neebaal, kuwaas oo dareemaya in kalsoonidooda iyo aaminaaddooda ay xaddidan yihiin markii laga hadlayo gudaha iyo bannaanka qolka wararkaba. Tan waxaa lagu muujiyyay, tusaale ahaan, xaddidnaantooda ama hoos udhaca marinnaada ilaha macluumaadka marka la barbar dhigo ragga dhiggooda ah. Xitaa ururada warbaahinta dhexdooda, waxay si gaar ah ugu nugul yihiin kadeedis jinsi, oo ay hareereyaan dhaqan kahirtag la' aan ah. Si kastaba ha noqtee, haweenku horay ayey u sii socdaan, qaar kamid ah ururrada saxaafadda ayaa qaataj tallaabo wax ku ool ah iyaga oo u magacaabay haweenka inay noqdaan go'aan-gaarayaal. Si kor loogu qaado xirfadahooda saxaafadeed, ururada qaar sida Ururka Suxufiyiinta Neebaali (FNJ), Ururka Suxufiyiinta Qaranka ee Asaliga (FONIJ), Ururka Saxaafadda ee Neebaal (NPU) iyo Haweenka Saxafiyiinta ah ee shaqeeya (WWJ) waxay tababar siinayeen haweenka. Iyada oo kaashaneysa Madasha Haweenka, Sharciga iyo Horumarinta, ayaa WWJ waxay

sidoo kale siisay caawimaad xagga sharciga ah dhibanayaasha dumarka ee kadeedka galmaada iyo bahdilka internetka. In kasta oo amaanka suxufiyiinta uu soo hagaagayay intii uu socday isku dhaca, intii u dhaxeysay bartamihii 2017 ilaa bartamihii 2018, Madasha xorriyadda Neebaal (FF) ayaa diiwaan galisay 66 dhacdo oo rabshado wata oo ka dhan ah shaqaalaha warbaahinta, dhacdooyinkaasoo u kala dhaxeeya xarig aan sabab lahayn iyo hanjabaado iyo xadgudubyo ay kamid yihiin kadeed galmo. Tusaale ahaan, waxaa la soo sheegay in haweeney shaqaale warbaahineed ah ay ku hareereysan yihiin oo ay qasbayaan kox ka mid ah ganacsatada ragga ah iyo maalgashadaasha “ineyan qori waxaan maslaxaddooda ahayn”. In kasta oo kadeedka galmaada ee goobta shaqada laga soo sheegayo ay tahay mid kamid ah hanjabaadaha ugu waaweyn ee ay wajahayaan haweenka saxafiyiinta ah, ayay haddana jirin xog ku saabsan arrintan.

Talaabooyin kala duwan ayaa la qaaday sanadihii la soo dhaafay si wax looga qabto rabshadaha ka dhanka ah suxufiyiinta. Sancharika Samuha (SAS) oo ah ururka ugu weyn ee haweenka ka shaqeeya warbaahinta Neebaal ayaa door muhiim ah ka ciyaaray la dagaallanka rabshadaha ka dhanka ah saxafiyiinta warbaahinta ka shaqeeya ee Neebaal. SAS waxay daabacday dhowr iyo tobant warbixinood oo ku saabsan xaaladda saxafiyiinta haweenka ah ee ku sugar dalka, faham qoto dheerna ku leh caqabadaha ay la kulmaan haweenka saxafiyiinta ah.

Warbixintoodii ugu dambeysay, ee la daabacay 2016, ayaa lagu ogaaday in haween aad u tiro yar ay qabtaan jagooyinka maamulka badidoodna ay daboolaan waxa loo arko “dhibaatantyat bulshada jilicsan” halkii ay hawlan lahaayeen siyaasad ama dhaqaale. Warbixinta ayaa sidoo kale tilmaantay in ka badan 40% aysan helin mushaharka ugu yar, taas oo si weyn wax ugu biirisa dareennada amni-darrada xirfaadeed. Isla warbixinta ayaa sidoo kale daaha ka qaadday in dhammaan cabbirrada warbaahinta oo dhan aysan lahayn siyaasado jinsi iyo barnamijyo, ay ku jiraan aalado la-dagaallanka kadeedka, oo haweenka ka horjoogsaday inay ka hadlaan kadeedka ku saleysan jinsiga.

Madasha Xorriyadda (FF) waxay kormeertaa weerarrada ka dhanka ah suxufiyiinta, oo ay ku jiraan haweenka saxafiyiinta ah ee dalka Neebaal, waxayna ku sameeyaan kormeer balaadhan oo warbaahinta ah, lana socta aragtida jinsiga. Warbixinta 2018 ayaa shaaca ka qaadday in kaliya 11% wadarta guud ee 623 ee loo yaqaan khadka ay yihiin haween. Sidoo kale, kaliya 10% dadka ayaa sheegay in ilaha wararka ay yihiin haweenka. Nanu Maiya Kpart, oo ah sarkaalka dabagalka jinsiga ee FF, wuxuu sharxayaa in warbixinta noocan oo kale ah oo leh tirakoobyada waxyeellada leh ay door muhiim ah ku leeyihiin kor-u-qaadista wacyiga ku saabsan sinnaan la'aanta jinsiga ee warbaahinta iyo doodaha dhiirrigelinta ah qaarkood waxay wax taryaan doorka warbaahinta.

Mid ka mid ah talooyinka ugu weyn ee warbixinta ayaa ah horumarinta siyaasadaha jinsi ee ka jira xarumaha warbaahinta, si wax looga qabto kadeedka jinsi iyo in la fududeyo warbixinnda xasaasiga ku ah jinsiga.

Hal tusaale oo dooddha soo ifbaxeysa ee ku saabsan ayaa ah sinnaanta jinsiga waa ololaha 2018 ee ay wadaan ururrada saxafiyiinta Neebaali iyo hay ` ado iyadoo lala kaashanayo xarumaha warbaahinta. Ololuhu wuxuu daabacyaa oo baahiyya sheekoooyin muujinaya rabshadaha loo geysto haweenka. Intaa waxaa dheer,in 2017, Ururka Caalamiga ah ee Saxafiyiinta (IFJ) ee Aasiya Pacific iyo Shabakada Iskuxirkha Warbaahinta Koonfurta Aasiya (SAMS) waxay bilaabeen ololihii (Byte Back) ee lagu joojinayo cagajuglaynta internetka iyo kadeedka loo geysto haweenka saxafiyiinta ah, iyagoo la wadaagaya qaabab cusub oo looga hortago kadeedka internetka , kor u qaadidda sheekoooyinka wanaagsan,

ijo muujinta nusqaamaha ka jira siyaasadaha looga hortagayo kadeedka internetka.

Sheekoyinku waxay muujiyeen in sharciga ka sokow, midnimada suxufiyiinta ay muhiim u tahay bixinta taageerada iyo soo afjaridda xadgudubka. Tababbarka badbaadada ee saxafiyiinta, oo ay ku jiraan haweenka, waxaa sidoo kale bixiya ururrada qaar. Waxqabadka Saxaafadda Neebaal (MAN) iyo Qodobka 19 ayaa u qabtay siminaarro loogu talagalay saxafiyiinta haweenka.

Is-faafreebka wuxuu ahaa mid ka mid ah arrimaha ugu waaweyn ee la soo qaaday. Amnidarrida, dhaqan gelinta sharciga oo aan ku filneyn, maqnaanshaha xukunka sharciga, iyo kahortaga ciqaab la'aanta baahsan ayaa dhamaantood ah sababaha is-faafreebka.

Toban sano iyo dheeraad kahor, koox ururro qaran iyo kuwa caalami ah oo ka shaqeeya warbaahinta gudaha Neebaal ayaa aasaasay koox dallad ah, oo hadda loo yaqaan 'Xiriirkha Warbaahinta Caalamiga ah ee Neebaal (NIMP) waxayna ka kooban yihiin 14 xubnoon. Tan iyo markaas, waxay sameeyaan booqashooyin joogto. Booqashadii ugu dambeysay ee sanadkii 2015kii waxaa diiradda lagu saaray gacan ka gaysashada abuuritaanka qaababka amniga qaranka ee Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Qaranka (NCHR). Tani waxay aasaastay qorshihii Qaramada Midoobay ee Waxqabadka Sanadka 2012 ee Nabdoonaanta Saxafiyiinta iyo Arrinta ka hortag la'aanta.

Worbixinta howlgalka iskaashigu ma xusin qaab gaar ah oo jinsi loogu daro kaqeybgalka. Worbixinta Howlgalka Wadajirka ah kama muuqato qaab gaar ah oo jinsi ah looguna talagalay ku darista habka. Dadaalo badan ayaa la sameeyay si loo helo habka amniga qaranka, laakiin weli lama bilaabin. Sida uu sheegayo Wakiilka Mohna Ansari, habka qabyada ah kuma jiraan tallaabooyin gaar ah oo loogu talagalay haweenka saxafiyiinta ah. Si kastaba ha noqotee, waxay codsatay ugu yaraan hal wakiil oo dumar ah qeybta ugu weyn ee xukunta mas'uul ka noqota habka kormeerka. Xarunta Qaranka ee Xuquuqda Aadanaha ee NCHR ayaa qaaday tillaabooyin wax looga qabanayo tacaddiyada ka dhanka ah haweenka, kuwaas oo qaarkood ay la xiriiraan haweenka saxafiyiinta ah. Marka hore, waxay mas'uul ka tahay la socoshada dhaqangalinta Sharciga kadeedka Jinsiga ee 2015 ee Kahortagga Goobta Shaqada.

Hawlaho iyo xilalka ay ku soo rogeen hay'adaha dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay oo ay ku jiraan warbaahinnada, ayaa sharcigu u baahan yahay in qodobbo gaar ah oo looga hortago kadeedka galmaida in lagu daro xeerarka shaqada. Ma jiraan wax xog ah oo la heli karo, hase yeeshe, taas oo shirkadaha warbaahinta ee Neebaal ay ku meelmariyeen qodobbadan, iyo, sida warbixinta IFJ ee waddanku xaqiijisay, "halka farsamooyinka noocan ah ay jiraan, haweenku way ku adag tahay inay soo sheegaan dhibaatayn iyagoo ka baqaya sida tallaabadi oo kale u dhacdo, iyadoo saameyn doontaa muuqaalkooda iyo shaqadooda." Worbixinta ayaa daaha ka qaaday in 81% dambiiliyaasha ay yihiin asxaab ama horjoogayaal xafis.

---

**"Suxufiyadda dibban ayaa go'aansatay  
ineysan ku dhaqaaqin wax tallaabo iyadoo  
ka ka baqaysa inay weydo shaqadeeda"**

NCHR waxay kaloo mas'uul ka tahay inay hesho cabashooyinka, la socoshada iyo sameynta baaritaannada ku saabsan xad-gudubyada xuquuqda aadanaha. Sanadkii 2018, waxay heshay maclumaad ku saabsan kiis saxafiyad haweeney ah ee lagu dhex kufsaday qolka wararka. Si kastaba ha noqotee, "Suxufiyadda dibban ayaa go'aansatsay ineysan ku dhaqaqin wax tallaabo ah oo ka baqaysa inay weydo shaqadeeda" iyadoo aan loo sheegin saamaynta ay ku leedahay qoyskeeda, maadaama kadeedka galmada loo arko wax laga xumaado bulshada dhexdeeda, ayay tiri Ansari. Waxay aragtideeda Ansari ku xoojisay oo tiri, waxaa muhiim ah iney bulshadu fahmaan halista weerarrada galmada iyo in la dhageysto haweenka markii la qorsheynayo xalka.

Booliska Neebaal waxay leeyihiin unugyo haween ah oo saameyn weyn ku yeelan kara arrintan. Guddiga Haweenka Qaranka sidoo kale wuu caawin karaa xaaladaha qaarkood. Si kastaba ha noqotee, ma jiraan cutubyo gaar ah oo si gaar ah ula macaamila kiisaska ay keeneen haweenka saxafiyiinta ah. Marka lagu daro talooyinka lagu hagaajinayo xorriyadda hadalka iyo xorriyadda saxaafadda ee Neebaal, hagaajinta amniqa suxufiyiinta haweenka waxay u baahan tahay kordhintu wacyiga dadweynaha ee weerarrada gaarka ah ee ka dhanka ah saxafiyiinta haweenka. Sidoo kale xarumaha warbaahinta waxay u baahan yihiin inay qaataan siyaasado gaar ah, oo ku saleysan talo soo jeedinta haweenka, iyo sidoo kale soo bandhigida jinsiga iyo kala duwanaanshaha qaab kasta oo mustaqbalka loogu talagalay badbaadada suxufiyiinta.

## Bakistaan: Jabinta aamusnaanta



Bakistaan ayaa ka mid ah waddamada ugu halista badan adduunka dhanka saxafiyiinta. Waxay sidoo kale u dhowdahay kaalinta ugu sarreysa xagga sharciga ee ciqaab la'aanta dambiyada ka dhanka ah suxufiyiinta, waxayna taagan tahay kaalinta 7aad sida uu qabo Guddiga Ilaalinta Ciqaab La'aanta Saxafiyiinta tusmada. Nuglaanshahoodu wuxuu ku xirnaan karaa deegaanka juquraafi ahaan ay ka hadlayaan, maaddada ay ku soo tebinayaan, iyo jinsigooda. Sanadkii 2010, Bakistaan waxay meel marisay Sharciga Kahortagga Dhibaataynata Haweenka ee Goobta Shaqada, taas oo awood u leh in lagu ilaalio haweenka saxafiyiinta ah. In kasta oo aysan si gaar ah u xusin haweenka, haddana waxay ku qasbeysaa shirkadaha, oo ay ku jiraan xarumaha warbaahinta, inay lahaadaan xeerar jinsi.

Weerarada loo geysto haweenka uguma badna liiska weerarrada loo geysto suxufiyiinta Bakistaan, laakiin haweenka saxafiyiinta ah waxay ka kooban yihiin kaliya 5% shaqaalaha warbaahinta gudaha Bakistaan - nabadvigaydu waxay noqon kartaa mid ka mid ah sababaha arrintan. Marka loo eego marag-kaca ay aruurisay Shabakadda Xorriyadda, shuruudaha shaqada ee xirfadlayasha warbaahinta haweenka waa kuwa ka culus kuwa ay la kulmaan ragga dhiggooda ah. "Tani waxaa ka mid ah hanjabaadyo iyo digniino laga soo saaray ilo kala duwan oo loogu talagalay shaqadooda suxufinimo iyo sidoo kale dhibateynta galmada ee goobta shaqada iyo haween-nacaybla ka hor istaagaya haweenka saxafiyiinta ah inay sallaan toosan ugu fuulaan xirfad kororsigooda shaqo". Bakistaan ayaa kaalinta 133aad ka gashay tusmada UNDP ee sinnaan la'aanta Jinsiga.

Saxafiyiinta haweenka ah waxay la kulmaan aragtiyo cadaawad leh kaliya maahee inay shaqadooda qabtaan, laakiin sidoo kale inay si fudud u ahaato dumarka indhaha dadweynaha ah. Tani waxay sidoo kale quseysaa bogagga internetka, sida ay diiwaangeliyan ururrada sida Digital rights Foundation (DRF). Magac-u-yeelista, cayda iyo aflagaaddada ayaa ugu sarreeya liiska, waxaa ku xigay isku dayo lagu dhaawacayo sumcadooda iyo sharftooda. Hanjabaadaha kale ee waaweyn waxaa ka mid ah aflagaaddo ama dhaleecayn lagu daabacay bogagga internetka, sumadayn xagga warbaahinta bulshada, liiditaan bannaanka ah, hanjabaada sharafjabinta iyo hanjabaadda rabshadda. Dhaqdhaqaqa firfircoo ee Nighat Dad waa mid ka mid ah hormuudka ololaha ka dhanka ah kadeedka internetka. "Waxaan arkay cabsi-gelin, sawirro la sawiray, jabsashada akoonnada shaqsiyadeed iyo hanjabaadaha kufsiga," ayay u sheegtay RSF. Sannadkii 2012, waxay abuuray Digital Rights Foundation (DRF) si ay uga caawiso haweenka Bakistaan sidii ay ula tacaali lahaayeen dhibaataynta internetka. Warbixinteeda "U Kuurgalka Suxufiyiinta Haweenka ee Bakistaan" waxay ogaatay in xadgudubka ay la kulmaan haweenka uu ka duwan yahay kan ragga ay la kulmaan. Xadgudubka jinsi ee lagula kaco haweenka wuxuu qaadanayaan dabeecad ka maskax sareysa midka lagula kaco ragga. Intaa waxaa dheer, in kasta oo ragga iyo dumarkuba ay ku dhici karaan kormeerka dawladda, haweenku waxay dareemaan inay ka fiirsadaan dhagastayaashhooda, wariyeyaasha kale, iyo xariirkha shaqsiyadeed. Bulshada oo dhami way daawanayaan.

Mashruuca DRF wuxuu gacan ka geysanayaa la dagaallanka cadaawadda loo hayo haweenka Bakistaan. Marka haweeney shaqaale warbaahineed ah la weeraro, taageero yar ayaa la heli karaa. Xitaa meeshi ay ka jiraan farsamooyin taageero, "ceeb bulshadeed, kala-sooc iyo ceebeynta ayaa ka celisa [haweenka] inay si furan uga hadlaan waxa qabsaday oo ay raadiyan taageero". Natijo ahaan, inbadan - kabadan 20% sida ku xusan DRF - si fudud ayey u joojinayaan adeegsiga internetka. Bytes for All waa koox dhiirrigelisa xuquuqda internetka, oo ay dumarku ku jiraan. Waxay siisay tababbaro ku saabsan badbaadada internetka haweenka saxafiyiinta ah iyo ardayda jaamacadaha ee wax ka barta isgaarsiinta. Ururrada dadaallada badbaadada saxafiyiinta ee Bakistaan ayaa baaray kiisaska haweenka iyadoo xitaa natijjooyin aan la soo koobi karin. Tusaale ahaan, Guddiga Hoggaaminta ee Sanduuqa Badbaadada Saxafiyiinta Bakistaan. Badbaadada saxafiyiinta haweenka: Jabinta wareegga aamusnaanta iyo rabshadaha (PJFS), oo la asasay 2012, waxay kaalmaysaa saxafiyiinta inay hanjabaado la kulmaan. Caawinaadkan waxaa ka mid ah dib u dejin muddo-gaabban ah, kaalmo caafimaad iyo sharci iyo caawinaad lacageed oo loogu talagalay qoysaskooda. Sida uu sheegayo Iqbal Khattak, Madaxa Fulinta Shabakadda Xorriyadda isla markaana xubin ka ah Guddiga Istaatistikada ee Sanduuqa Badbaadada Suxufiyiinta Bakistaan, si kastaba ha noqotee, haweenku way ku adkaatay inay adeegsadaan kaalmada ay sabab u tahay cadaadiska bulshada. Ilaa 2012kii, Khattak waxa uu leeyahay, wax haween ah oo helay taagero ma jiraan haweeneyda kaliya ee u soo dhawaatay sanduuqana, aakhirkii waxay go'aansatay inayna aqbalin culaysyo ka soo wajahay xagga reerka / bulshada aawadood. Sida laga soo xigtay Khattak, sahanno dheeraad ah iyo cilmi baaris ayaa loo baahan yahay in la sameeyo si loo hubiyo in haweenku ay raadiyan taageero, iyo in la qabto shaqo dheeri ah si loo hubiyo in xarumaha warbaahinta ay leeyihii xeerarka jinsiga.

Sawirkan oo la qaaday  
30kii Agoosto 2016,  
Shazia Bhatti, oo ah saxafi  
reer Bakistaan ah oo  
38-jir ah ayaa qaadday  
muuqaal fuidyoow ah intii  
ay ku gudojirtay howlgal  
Islamabad dhexdeeda.  
Sawir: Aamir Qureshi /  
AFP / Ritzau Scanpix



Kaddib oggolaanshaha Qorshaha Qaramada Midoobay ee Tallaabada Badbaadada Saxafiyiinta iyo Arrinta laalista, Isbahaysiga Bakistaan ee Badbaadinta Sxaafadda (PCOMS) waxaa la aasaasay 2013ki si loo helo isbahaysi iskaashi oo dhinacyo badan leh si wax looga qabto badbaadada suxufiyiinta. Sida laga soo xigtay Khattak, tani waxay ahayd bilow cusub marka laga hadlayo ajandaha arrimahan ee Bakistaan. Hase yeeshi, ma jiro xog ku saabsan talaabooyin gaar ah oo loo qaaday ujeeddada gaarka ah ee kor u qaadista amniga saxafiyiinta haweenka. Tifaftirayaasha Badbaadada ayaa ah dadaal aan horay loo arag oo ka soo baxay dadaalka lagula dagaallamayo rabshadaha ka dhanka ah suxufiyiinta Bakistaan. Waxaa ku jira koox WhatsApp ah halkaas oo laga soo sheegi karo weerarada ka dhanka ah suxufiyiinta, taas oo fududeyn karta go'aan wadareedka sida looga falceliyo.

Waxaa la bilaabay sanadkii 2015ki, Shabakada Saxafiyiinta Badbaadada ee Saxafiyiinta Bakistaan Press Club waxay soo urursadeen lix naadi oo kamid ah warbaahinta ugu waaweyn Bakistaan iyo Shabakada Xoriyadda si loo wanaajijo warbixinta, dokumentiyada iyo falanqaynta halista iyo weerarrada loo geysto suxufiyiinta. Xarumahaasu waxay ka shaqeyeen sidii loo heli lahaa haween badan oo kamid ah iskuduwaha xarunta, laakiin way dhib badneyd. "Kaliya ma dalbanayaan [doorarka]," Khattak ayaa leh.

Naadiyada Sxaafadda Qaranka ayaa sidoo kale, xaaladaha qaarkood, bilaabay inay ku daraan ka hadalka jinsiga ee shaqadooda.

Tusaale ahaan, Naadiga Madbacadda Qaranka ee Islamabad ayaa beddelay dastuurkeeda iyada oo ugu yaraan laba kursi loogu talo galay haweenka ku jira 17ka xubnood ee dawladda. Tani waxay ahayd natijadii dalabaadka lagu sameeyay shirkii qaran ee 2014 ee haweenka iyo warbaahinta oo ay soo qabanqaabisay Ururka Suxufiyiinta ee Bakistaan iyo Naadiga Sxaafadda Qaranka oo ay ka heleen maalgelin iyo taageero


farsamo oo ay bixisay Aurat Foundation. "Tallaabandan ayaa horseedday inay haweenku ka qaybgalaan siyaasadda hay'adaha warbaahinta. In badan oo haween saxafiyiin ah ayaa u yimid inay codeeyaan oo ay wadaan ololeyaal. Dumar badan ayaa u ordhayay kuraasta xilalka guud, "waxaa sidaas sharaxay Myra Imram, Kuxigeenka Golaha Warbaahinta Qaranka. Dadaal kale oo xiisa leh oo ay sameeyeen Naadiga Saxaafadda Qaranka (NPC) ee magaalada Islamabad ayaa ah sameynta guddi wax ka qabta kiisaska la xiriira tacaddiyada galmada ee lagula kaco haweenka saxafiyiinta ah. Intaa waxaa dheer, cilmi baaris ayaa la sameeyay si loo falanqeyyo saameynta dilka ama barakaca suxufiyiinta iyo qoysaskooda ka soo food saara iskahorimaadyada deegaan qabyaaladeedka dowladdu maamusho ee loo yaqaan (FATA). Daraasaddan "Sheekadii Badbaadada" ayaa laga soo xigtay Mira Imran, oo ah Madaxweyne Kuxigeenka Naadiga Saxaafadda Qaranka, iyada oo tiri "qofna uma gargaarin xaasaska saxafiyiinta lagu diley aagaggaas". Sidaa darteed, ayay tiri, waxaan u doodeynaa dawladda inay meelmariso tallaabooyin lagu daryeelayo iyaga.

Tusaalahal kale ee isbedelka Bakistaan waa in sanadkii 2014kii, Ururka Shaqaalaha (in-house Union of the News' employees), ay yeelatay madaxweyne haweeney ah markii ugu horeysay taariikhdeeda 23 sano. Laba haween ah oo kale, Madaxweyne ku-xiggen iyo xubin guddiga maareynta ah, ayaa iyaguna leh jagooyin go'aan qaadasho. Sheers Bah, oo ah tifaftiraha wargayska The News ayaatiri "doorashadayda markii aan ahaa gudoomiyaha ururka, waxaan ku qasbay dhammaan saraakiisha ururka inay la xiriiraan haweenka oo ay bilaabaan diiwaan gelinta iyo inay muujiyaan dareenkooda," Waxaan kaloo sameeyay guddi haween ah oo eegi doona arrimaha ay ka midka yihii mushahar isku mid ah, qiimeynta waxqabadka, dallacsiiinta, ceymiska caafimaadka, fasaxa umusha, musqulaha u gaarka ah, gaadiidka, saacadaha shaqada, amniga shaqada, dhibaateynta goobta shaqada, iyo jinsi-takooridda shaqooyinka (garaacista)," ayay raacisay.

Sannadkii 2005, kooxda cilmi-baarista ee Uks waxay soo bandhigtay Xeer Akhlaaqeedkii ugu horreeyay ee jinsiga ku saabsanaa ee Daabacaadda ee Bakistaan. Waxaa dib loo eegay 2013. Xeerkana, oo loogu talagalay in si samafal ah loogu adeego warbaahinta, ayaa si cad u qeexaya heerarka, dabeecadaha iyo dhaqanka laga filayo soo bandhigayaasha, barayaasha, baarayaasha, soosaarayaasha, qorayaasha, shakhsiyaadka kaamirada, shaqaalaha tifaftirka siyaasadaha, iyo maamulka sare ee xarumaha warbaahinta. Si kastaba ha noqotee, inkasta oo la faafiyey oo dhammaan daneeyayaasha muhiimka ah ay ku lug lahaayeen qoritaankiisa, si hagaagsan looma meel-marin (xogta laga bilaabo 2015).

Dhammaan tallaabooyinkaas oo ka caawinaya in si wax looga qabto rabshadaha ka dhanka ah haweenka suxufiyiinta internetka iyo daabacaadba, laakiin waxqabad badan ayaa dhiman. Sida weriyaha reer Bakistaan Asma Shirazi ay sheegtay, "waxaa jirta baahi loo qabo in la abuuro guddi heer qaran ah oo ka ilaaliya haweenka saxafiyiinta ah kadeed haddeey ku jiraan baraha bulshada ama goobahooda shaqo".

## Soomaaliya: Sii xoojinta sinnaanta jinsiga xagga warbaahinta



Soomaaliya waxay weli ku jirtaa waddammada ugu halista badan adduunka saxafiyiinta, waxaa ka jira dhaqan kahortag la'aan ah. Waxay lahayd tiradii ugu badnayd ee dil aan loo meeldayin oo suxufiyiin ah intii u dhaxeysay 2015kii iyo 2017. Suxufiyiintu waxay la kulmayaan khatar badan, oo ay ka mid yihiin dil, xarig iyo weerar. In kasta oo ay jiraan heerar sare oo khatar ah, daraasad ay sameeyeen Suxufiyiinta Haweenka Soomaaliyeed (SWJO) oo kaashanaya IMS-Fojo Media ayaa lagu ogaadey in waddanku asal ahaan uusan lahayn hannaan badbaado iyo badbaadin, iskaba daa habab gaar u ah arrimaha jinsiga.

Iyagoo tiro ahaan 23% ka ah shaqaalaha, ayaa haweenka saxafiyiinta ah si aan sax ahayn loogu matalaa xarumaha warbaahinta Soomaaliya, waxayna leeyihiin doorar xadidan go'aan qaadashada guddiyada abaabulka. Sababaha arrintani waa kala duwan yihiin, oo waxaa ka mid ah heerarka waxbarashadooda oo hooseeya marka la barbar dhigo ragga dhiggooda ah, ka gaabinta shaqaalaynta ku salaysan sinnaanta jinsiga, la'aanta siyaasadaha heshiiska iyo nidaamyada lagu hormarinayo haweenka shaqooyinka wargeesyada, iyo carqalada dhaqameed. Dumar aad uga badan ragga ayaa sheegaya inaysan ku qanacsanayn doorarkooda, inta badan sababta oo ah 'cadfaalad-darrada' maamulka ay kula dhaqmaan.

Marka laga soo tago halista shaqada haweenka saxafiyiinta ah ee Soomaaliya la wadaagaan asxaabtooda ragga ah, waxay kaloo bartilmaameed u yihiin kadeedka galmo iyo rabshado ku saleysan jinsi gudaha iyo banaanka goobta shaqada. Mid ka mid ah caqabada wax ka qabashada dhibaatadan waa xog la'aanta, maadaama ay arrintu wali tahay mid ceeb ah. Marka loo eego sahanka ay sameysay SWJO, kaasoo awood u yeeshay inuu soo uruuriyo xog kooban, 13% jawaab bixiyaasha waxay la kulmeen kadeed xagga galmoda ah shaqooyinkooda hadda ama kuwii hore. Daraasaddu waxay kaloo xustay inay jirto caddayn tirada laga yaabo inay intas ka badan karto. Marka si ahaan loo eego, inta badan weerarradan waxaa fuliya rag jago ahaan ka sarreeya, oo ay ku xigaan shaqaale dhiggooda ah, kaddibna heer hoose, wakiillo ka socda dawladda. Arinta daran, 36% haweenka saxafiyiinta ah jawaab kama aysan helin 28%na, iyagoo u baqaya nabadjelyadooda iyo shaqooyinkooda, waxay dhaheen waxba kama qaban lahayn haddii nala dhibaateeyo.

Daraasadda ayaa ku soo gabagabaysay sidan "ma jiraan qaabab adag oo looga jawaab-celinayo kadeedka galmoda ee goobaha warbaahinta". Sidaa daraadeed, iyada oo la raacayo gabagabada daraasaddan iyo warqad kale oo 2015kii ah oo ku saabsan jinsiga iyo saxaafadda Soomaaliya, waxaa jira baahi cad oo loo qabo dadaallo ay ka mid yihiin xeerar jinsiyeedka, ka muujinta arrimaha jinsiga dhammaan barnaamijyada tababbarka saxaafadda, oo ay ku jiraan tababarka amniga, iyo in la dhiirrigeliyo feejignaanta jinsiga ee wakiillada fulinta sharciga iyo garsoorka. Qaar kamid ah dadaalladan ayaa tan iyo markii la bilaabay.

Laba kamid ah ururrada ugu waaweyn ee xirfadleyda ah ee ka jira Soomaaliya, Xiriirkha Suxufiyiinta Soomaaliyeed (FESOJ), oo xaruntiisu tahay Muqdisho, iyo Ururka

Warbaahinta Puntland (MAP), oo ku yaal Garoowe oo matalaya danaha saxafiyiinta Puntland, ayaa kamid ah kooxaha haweenka ee diiradda saaraya arrimaha jinsiga. Waxay u qabteen siminaarro tababbarr loogu talagalay haweenka saxafiyiinta ah waxayna sameeyeen dadaallo ay ku shaqaaleysiinaayaan haween dheeri ah si ay ugu biiraan waaxda warbaahinta. Wuxuu qabtay, waxay bixiyeen tababar badbaado oo "saameyn muuqata laga dareemi karo" kaaqeybgaleyaasha. SWJO, tusaale ahaan, waxay xooggaa saartay ololyaasha u doodista si loo wanaajiyoo xaaladaha shaqada ee saxafiyiinta haweenka. Sidaas darteed, 10 xarun oo warbaahin ayaa ku heshiiyay in la bixiyo fasaxa umusha ee seddex bilood ah, taasoo ah tallaabo aan horay loo arag oo ay sameeyeen shirkadaha warbaahinta. Natijadii ka soo baxday barnaamijka Haweenka ee wararka, kaaqeybgaleyaasha WIN waxay bilabeen Shabakadda Haweenka (MWN), oo ay taageerayaan IMS iyo Fojo. Furitaanka ayaa isu keenay suxufiyiin ay ku jiraan suxufiyiin haween ah iyo agaasimayaasha warbaahinta si loo ogaado caqabadaha jinsi ee ka jira bahda warbaahinta. Inbadan oo kamid ah aqoon yahanadan, tani waxay u ahayd markii ugu horeysay ee ay ka hadlaan arrimahaan iyo xalka imaan kara. Sidaas darteed, sanadka 2018, koox saxafiyiin haween ah iyo maareeyayaal warbaahineed oo rag ah ayaa ku heshiiyay qorshe-hawleed wax looga qabanayo kadeedka galmaada ee shaqada warfaafinta.

Sanadka 2018, iyada oo ujeeddadu tahay kor u qaadidda sinnaantajinsiga iyadoo la siinayo tababar maareyn warbaahineed oo loogu talagalay haweenka, Ururka Caalamiga ah ee wargaysyada (WAN-IFRA) oo ay wehliyan IMS iyo Fojo ayaa Soomaaliya u keenay barnaamijkoodii Caalamiga ahaa ee Haweenka Wararka ku jira (WIN). UNESCO iyo Vikes, tusaale ahaan, waxay sidoo kale u qabanqaabiyaan aqoon isweydaarsiyo loogu tala galay ciidammada amniga Soomaaliya sida kor loogu qaadayo amniga suxufiyiinta iyo sida loo wajaho kiiksaka qaaska ah. Aqoon isweydaarsiyada waxay ku saleysan yihiin buuga tababbarka oo tixraac weyn ka muujinaya baahiyaha gaarka ah ee saxafiyiinta haweenka.


Hal ballanqaad oo ku aaddan badbaadinta suxufiyiinta Soomaaliya waa Barnaamijka Badbaadada Saxaafadda ee Soomaaliya, oo la bilaabay Maajo 2018. Waxaa loo xilsaaray isku dubbaridka ka hortagga iyo badbaadinta suxufiyiinta khatarta ku jira, iyo in la maxkamadeeyo kuwa geysta dambiyo ka dhan ah saxafiyiinta. Howshan waxaa hogaminaya 11 qof oo ah Guddiga Isuduwidha Qaranka oo ka kooban afar wakiil oo ka socda ururada warbaahinta, afar ka socda dowladda iyo saddex ka socda bulshada rayidka ah. Ugu yaraan saddex waa haween laga soo qaataay koox kasta oo mataleysa. Tan waxaa loo arkaa inay tahay tallaabo muhiim ah oo loo qaaday "in la hubiyo in arrimaha nabadgelyada iyo amniga ee saamaynaya haweenka la tixgeliyo iyada oo qayb ka ah shaqada guddiga ee sameynta nidaamka amniga qaranka".

Sida laga soo xigtag Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska, oo uu guddoomiye u yahay Guddiga, himilooyinka habdhaqanka ayaa waxaa ka mid ah la

socodka xaaladda suxufiyiinta iyo amniga, u doodidda amniga saxafiyiinta, sameynta khadka tooska ah ee saxafiyiinta khatarta ku jira, bilaabida sanduuq dhaqaale, sameynta sharchiyo loogu talagalay badqabka suxufiyiinta iyo dhisidda awoodda wariyeaasha. Hindisaha ayaa wali ah mid cusub, natijjooyinkana wali lama arkin. War-saxaafadeed ka soo baxay Wasaaradda oo qeexaya yoolalkaas ayaan lagu xusin qaab ku saabsan jinsiga ama tallaabooyin gaar ah oo loogu talagalay haweenka saxafiyiinta ah.

Habdhaqankan ayaa waxaa taageeray UNESCO iyo jilayaasha kale ee warbaahinta caalamiga ah, oo ay isuduweyeen Kooxda Taageerada Warbaahinta Soomaaliya (SMSG). SMSG, oo la aasaasay 2014 oo ay madax ka tahay UNESCO, waxaa ku jira koox deeqbixiyeyaa ah, hayadaha UN-ka iyo la-hawlgalayaasha fulinta. Waxaa loo aasaasay in la taageero oo la horumariyo warbaahinta Soomaaliya. IMS iyo Fojo ayaa ku amaahiyay taageeradooda dadaallo badan oo dalka ka socda, iyadoo ay ugu dampaysay siminaarro lagu tababarayay tababarayaasha xagga amniga. IMS iyo Fojo ayaa sidoo kale taageeray tabobarro dhinaca badbaadada ah iyada oo loo marayo dhowr ururro warbaahineed sida Ururka Madaxa bannaan ee Xarumaha Warbaahinta Madaxa bannaan ee Soomaaliya (SIMHA), oo matalaya 22 xarumo warbaahineed iyo Ururka Sakaafadda Soomaaliya (SOMA), oo matalaya 36 xarumo warbaahineed oo ku yaal Soomaaliya. Badbaadada haweenka saxafiyiinta ah: Jabinta wareegga aamusnaanta iyo rabshadaha.

## Filibbiin: Curin fikrado cusub ee nabadgelyada



Filibbiin waxaa lagu yaqaanaa weerarrada ugu dhiigga badan ee lagu qaado saxafiyiinta tobankii sano ee la soo dhaafay. Soddon iyo laba kamid ah shaqaalahi warbaahinta ayaa lagu dilay Ampatuan 2009. Kiiska ayaa wali ah mid aan la xallin, isaga oo fariisinaya Filibbiin kaalinta shanaad ee tilmaanta CPJ Guddiga Difaaca Saxafiyiinta 2018. Rabshadaha ka dhanka ah suxufiyiinta dalka ayaa sii kordhaya, laga soo bilaabo Luulyo 2016 ilaa Oktoobar 2018, ugu yaraan 85 weerar iyo hanjabaado ayaa la diiwaangeliyay, 23 kamid ah waxay bartilmameedsadeen haweenka. Xogtan waxaa aruuriyay Xorriyadda Sakaafadda, Xorriyadda Dhammaan Shabakadda, Dallada u ah Xarunta Xorriyadda Sakaafadda iyo Xallinta (CMFR), Ururka Suxufiyiinta Qaranka ee Filibbiin (NUJP), Machadka Sakaafadda ee Filibbiin (PPI), MindaNews, iyo Xarunta Filibbiin ee Sakaafadda Baarista (PCIJ). In kasta oo ay ilaalinays dastuurka, sida uu sheegayo CMFR “xorriyadda suxufiyiinta iyo ururrada warbaahinta si ay u soo sheegaan runta oo ay ugu adeegaan shacabka ayaa xitaa khatar badan gelisay jawiga siyaasadeed ee hadda jira.

